# SIYAASADDA MACDANTA

2025



WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA

JAMHURIYADDA SOMALILAND

# Weedha Wasiirka



Somaliland waxaa ka jira fursado badan oo maalgashi iyada oo uu dalku u jeestay inuu dhaqaalahiisa ka weeciyo in xoolaha nooli iyo waxa ka soo baxaa ahaadaan laf dhabarta dhaqaalaha.
Iyada oo dhammaan tiirarka dhaqaale iyo aagaga la xidhiidhaaba ay Somaliland u leeyihiin ahmiyad siman, haddana aagaga tamarta iyo wax soo saarka ee macdanta iyo shidaalka waxay ahaan macdanta iyo macdan-qodistu inay yihiin kuwa ugu lama huraan u yihiin xaqiijinta qaranka ee koboc dhaqaale.

Dhowrkii sano ee la soo dhaafay, waddanku wuxuu ku tallaabsaday horumar la taaban karo oo dhidibbada loogu dhigayo maal-gashiyo aad u balaadhan, haday noqoto kuwo gudaha ah iyo sidoo kale kuwo dibaddaba. Dawladdu waxay dadaal dheer u gashay dardargelinta ganacsiga iyo maalgashiga, taas oo ku suntan wajihidda istiraatijiyada iyo u-heelanaanta leh ee maamulidda dhaqaalaha, iyada oo la raacayo dariiq aan cabudhinayn dhaqdhaqaaqa iyo koboca. Maalgashadayaasha ajaanibka ah, tani waxay ka dhigan tahay faragelin yar, marka laga eedo aasaasidda iyo qaabka ay wax u samaynayaan ganacsiyadu, iyo sidoo kale dib ula bixidda raasamaalka.

Iyada oo ay Somaliland tahay dal weli curdin iyo cusayb ku ah macdan-qodista, iskudhafka wanaagsan ee tuhunka wanaasan ee cilmi-dhuleed, siyaasadeed, awooda dhaqaale iyo horumarinta kaabayashal dhaqaale ee mudooyinkii u danbeeyey, oo ay ka mid yihiin, balaadhinta iyo casriyaynta Dekedda Berbera iyo wadada isku xidhka, ayaa Somaliland ka dhigtay goob soo if-baxaysa oo soo jiidasho u leh daneeyayaasha macdan-qodista. Arimahaas oo lagu daray daahfuradii macdanta ee dhowaan iyo baadhitaanadii shidaalka ee dhowaan la sameeyey ayaa dhaliyey tiro sii kordhaysa oo ah shirkaddo ajaanib ah oo macdan-qodis oo doonaya inay wax ka ogaadaan ama doonaya liisamo iyo heshiisyo xuquuqo macdaneed oo ay ka helaan Somaliland gudaheeda.

Somaliland waxa ay qayb ka tahay taxanaha silsiladeed buuraha loogu yeedho Mozambique Belt oo ah meelaha qaniga ku ah macdanaha Afrika.
Dhanka kale, labadii sannadood ee u dambeeyay waxa soo if-baxayay danayn sii kordhaysa oo muwaadiniinta reer Somalilan ku doonayaan inay u kacaan hawlo sahamin iyo macdan-qodis, haba ahaadaan samayn mashaariic koobkooban.

Hannaanka ay shirkadaha macdan-qodistu ku qaataan ruqsaddaha iyo heshiisyada xuquuqaha macdanta ee Somaliland gudaheedu waa mid ku dhisan cadaalad iyo daah-furnaan oo ay u siman yihiin shirkadaha maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ahba. Dawlad ahaan, mudnaanta ugu horaysaa waa in aan xaqiijino jiritaanka xayndaab-habraac siyaasaddded oo dhamaystiran, awood-siin leh, sharci-dejin, xeer-nidaamin iyo hanaanka maaliyadeed, si loo fududeeyo horumarinta aaga macdanta iyo macdan-qodista ee Somaliland.

Xeerka Macdanta Somaliland, Xeer-nidaamiyayaasha Macdan-qodista iyo Siyaasadda Macdanta iyo Macdan-qodista ayaa bixinaya jawi wanaagsan iyo soo jiidashooyin ku wajahan maalgashiga aaga macdanta iyo macdan-qodista ee Somaliland. Qodobada maaliyadeed ee ku wajahan maalgashiga ee uu dhigayao Xeerka Macdanta iyo sidoo kale Xeerka Maaliyadda, waa kuwo soo jiidasho leh marka la barbardhigana ka wanaagsan xeerarka macdan-qodista eedalalka kale. Tusaale ahaan, sanadaha ugu horreeya qarashaadka raasamaalku aad ayuu ugu badan yahay shirkadaha macdan-qodista ka dib marka diyaariyaan oo ku bilaabaan hawlgallada sahaminta. Tani waxa ay nefis ka siinaysaa xagga shuruudaha cashuuraha la bixiyo sannadaha ugu horreeya ee marka la bilaabo hawlgallada.

Intaa waxaa dheer, xeer-nidaamiyaha ajuurooyinka (royality regulation) ee sida uu dhigayo Xeerka Macdanta ayaa leh qodobbo saamaynta wax ka bedelka xanibaya (stability clauses), kuwaas oo ku qoran heshiisyada macdanta iyo sidoo kale hakin, dhimista iyo dib u dhigista qarashaadka ajuurooyinka marka ay jirto xaaladdo gaar ah, kuwaas oo ah dhiirigelinno dheeraad ah.

Hannaankaga cusab masuuliyadda leh, isla markaana dhamayska tiran ee maamulidda macdan-qodista ujeedadiisu waa in maalgashiga aaga macdanta iyo macdan-qodista ee Somaliland aanu keliya noqon mid soo jiidasho leh laakiin uu sidoo kale noqdo mid guulaystay. Ujeedadayadu waa inaan kugu taageerno go'aankaaga ah inaad maalgashato aaga macdanta iyo macdan-qodista Somaliland iyo in aanu hubino in faa’iidada maalgashiyadaasi si siman oo dheeli tiran ay u wadaago dawladda iyo shacabka Somaliland oo dhinac ah iyo maalgashadayaasha oo dhinac kale ah. Sidaa darteed, waxaanu kugu martiqaadaynaa ka qaybgasho jawigayaga maalgashi ee firfircoon isla markaana dhisan saaxiibtinimada. Nagu soo biir si aynu aagan uga dhigno mid guulaysta.

**MUDANE. ENG. AXMED JAMAC BARRE**

**WASIIRKA WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA**

# Mahadnaq



Ku Soo Dhawoow siyaasadda Macdanta Somaliland.

Siyaasadda Macdanta iyo Macdan-qodista Somaliland waa mid si dhab ah oo ugu habboon oo halbeeg u ah kobcinta iyo abuurida fursadaha maalgashiga iyo heshiisyada.

Siyaasaddu waxa ay bixinaysaa aragtiyo, lafagurid iyo fahan muhiim ah si ay caawimo ugu noqdaan daneenayaasha doonaya inay u kuurgalaan iyo sidoo kale daneeyayaasha bah-wadaagaha kale ee aaga macdanta iyo macdanqodista ee Somaliland.

Waxaa looga golleeyahay, hubinta in laga helo wax soo saar sareeya oo ka yimaada ganacsiga macdan-qodista iyo maalgashigeeda iyo in si guud loo horumariyo bah-wadaagta macdanta.

Shakhsiyaad badan ayaa juhdi iyo dadaal badan galiyay samaynta dukumeentiga Siyaasaddan.
Waxaan mahad balaadhan ku maamusaynaa cid kasta oo gacan ka gaysatay samaynta Siyaasadda Macdanta iyo Macdan-qodista Somalialnd.
Wanaag weyn baanu u haynaa Mudane. Jaamac Xaaji Maxamuud Cigaal, Wasiirkii hore Wasaaradda Tamarta & Macdanta, Mudane Cabdilaahi Faarax Cabdi, Wasiirka Wasaaradda Tamarta & Macdanta oo soo jeediyey istiraajiyad guud jihayneed, hagid iyo la socod intii lagu jirey diyaarinta dukumeentiga Siyaasaddan. Doorka hagar la'aanta iyo tabataabin farsamo ee Omer Yusuf Omer, Agaasimahii hore Waaxda Macdanta iyo Jamac Mohamed Adan, Agaasimaha Waaxda Macdanta. Waxaan sidoo kale qirayaa ka-qaybgalkii iyo isku hawlidii shaqaalaha farsamo ee Waaxda Macdanta, oo bixiyay wax ku kordhin waxtar leh, gaar ahaan hubinta iyo is waafijinta nidaamka waddanka gudahiisa.

Intaa waxaa dheer, oo wax lagu farxo oo xusid mudan ah qayb-qaadashadii Axmed Maxamuud Aadan, Agaasimaha Waaxda Shidaalka iyo sidoo kale hawlwadeennanda kale ee farsamo ee muhiimka ah ee ka kala socday Waaxaha kala duwan ee Wasaaradda ee ay ka midka yihiin, Waaxda Tamarta iyo Shidaalka.

Talobixinta iyo ka qayb qaadashada iyo isku durba ridka siyaasadan Agaasimah waaxda shuruucada ee Wasaaradda Cabdiraxman haariye ayaa door muhiima ka qaatay, gaar ahaan hubinta qaybaha ku haboonaanshaha iyo is-waafajinta xeerarka kala duwan ee Somaliland.

Ugu dambayntii, waxaanu mahad balaadhan u soo jeedinayaa Cabdiraxmaan Ismaaciil oo ah La-taliye Sare oo xagga Tamarta, Macdanta iyo Shidaalka ah, isla markaana ahaa la-taliyaha kaalinta hormuudka ah ka qaatay samaynta Siyaasaddan, isaga oo door muhiim ah ka qaatay, dedaal iyo wakhti badan galiyay sidii uu hagi lahaa kooxda farsamo ee wasaaradda ee ku hawlanaa Siyaasaddan.
Cabdiraxmaan waxa shaqada cilmi-baadhista iyo iskudubaridka macluumaadka ka caawiyey Yassien Cabdillaahi iyo Elisha Moseti Ratemo.
Halka Boniface Gor iyo kooxda Digimatt Solutions Limited ay lahaayeen nashqadaynta jaantusyada, qaabqoraalka iyo daabacaadda Siyaasadda.

Waxaan rajaynaynaa in Siyaasadda Macdanta iyo Macdan-qodista ee Somaliland ay macluumaad iyo hagitaan wax ku ool ah siin doonto maal-gashadayaasha la filayo inay Somaliland ka hirgeliyaan hawalha Macdanta, oo taasina horseeddi doonto korodh tirada heshiisyada sahaminta iyo macdan-qodis.

**SHUCAYB CISMAAN MAXAMUUD**
**AGAASIMAHA GUUD**
**WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA**

# Tusmada Buugga

Weedha Wasiirka 2
Mahadnaq 4
1.1 Hordhac 9
1.2 Macnaha Guud ee Siyaasadda 10
1.3 Ujeedooyinka Siyaasadda iyo Mabaadii'da Hagaya 11
1.4 Halka ay Siyaasaddu ku Qotonto 12
1.4.1. Hiigsiga Qaranka Somaliland ee 2030 12
1.4.2. Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) 13
2. Falanqaynta Siyaasadda 15
2.1 Arrimaha Dhaqaalaha, Horumarinta Kaabayaasha iyo waxyaalaha kale ee kaabaya 16
2.1.1 Kaabayaasha dhaqaalaha 17
2.2 Xeerka iyo Xeer-nidaamiyayaasha Macdanta 17
2.3. Helitaanka Dhulka si loogu hirgeliyo Macdan baadhis iyo Macdan qodis 19
2.4 Xogta iyo Macluumaadka Cilmiga dhulka 20
2.5 Suuq-geynta iyo Qiime u Kordhinta Macdanta. 21
2.6 Horumarinta Awoodda Hay'addeed iyo Awoodda Qofeed 22
2.7 Joogteynta Baadhitaanka Khayraadka Macdanta 24
2.8 Dib u Isticmaalidda Macdanaha iyo Biraha 26
2.9 Shaqaalaysiinta haweenka iyo da'yarta 28
2.10 Macdan Qodista Kooban iyo Macdan Qodista Qadiimiga (ASM) 30
2.10.1 Maalgelinta Shirkadaha ku hawllan Macdan Qodista 31
2.10.2 Nidaamyada Wada-shaqaynta iyo Iskaashiga 33
2.11 Iskaashiga Bulshada iyo Dawladda 34
2.12 Wax-ku-darsiga dalka 35
2.12.1 Hannaanka Maaliyadeed ee Dalka 35
2.12.2 Qodobbada Maaliyadeed 37
2.12.3 Khidmadaha 37
2.12.4 Ujoorooyinka 37
2.12.5 Tixgalinta gaarka ee qaab bixinta ajuurooyinka 37
2.12.6 Abuuridda Deegaan dhiiri-galinaya hannaanka maaliyadeed ee dalka, cashuuraha iyo isu socodka lacagaha 38
2.12.7 Cashuuraha Dhiirigaliya Maalgashiga 38

# Tusmada Buugga

3. Ujeedooyinka, Qaab-dhismeedka iyo Mabaadi'da Hagaya Siyaasadda 39

3.1 Istiraatiijiyadaha Siyaasadda 40

3.1.1 Hagaajinta hab maamulka macdanta iyo macdan-qodista. 40

3.1.2 Maaraynta heshiisyada iyo Qoondaynta Xuquuqda Macdanta 40

3.1.3 Xogta iyo Macluumaadka Jiyoolajiyeed 41

3.1.4 Helitaanka Dhul Macdaneedka 42

3.1.5 Dhulka Magaalooyinka 43

3.1.6. Dhulka Beeraha 43

3.1.7. Dhulka Miyiga / Daaqsinka ah 43

3.1.8. Dhulka Macdan-qodista 43

3.1.9. Xuquuqda lahaanshiyaha oogada dhulka iyo Macdanta 44

3.1.10 Xeerarka Deegaanka ee La Xidhiidha Sahaminta iyo Qodista Macdanta 45

3.1.11 Caafmaadka iyo Badbaado-qabka 46

3.1.12 Hannaanka Maaliyadda 47

3.1.13 Kobcinta iyo qiime ku kordhinta macdanta (value addition) 50

3.1.14 Kordhinta Faa'iidooyinka laga dheefsado Macdanta 52

3.1.15 Wadaagidda Faa'iidada Macdanta Laga Dheefsado 54

3.1.16 Wadaagista Dheefta Laga helo Ajuurooyinka Macdanta 54

3.1.17. Heshiisyada Horumarinta Bulshada (Community Development Agreements (CDA)) 55

3.1.18 Ka-qaybgalka Macdandanta ee Loo Simanyahay 56

3.1.19. Macdan-qodista Qadiimiga ah iyo Macdan-qodista Kooban (Artisanal and Small-Scale Mining) 56

3.1.20. Jinsiga, Dhallinyarada iyo u wada-dhammaanshaha Macdan-qodista 59

4. Qaab-Dhismeedka Haayada 61

4.1 Kobcinta Awooda 62

4.2 Nidaamaynta Haayadda 62

5. Qorshaha Fulinta 64

5.1 Xayndaab-habraaca Fulinta 65

5.2 Maalgalinta Siyaasadda 65

5.3 Qiimaynta iyo Dabagalka 65

5.4 Dib u eegista Siyaasadda 66

5.5 Gallery Photos 67



# Cutubka

# 01

# Hordhac

## 1.1 Hordhac




Somaliland waa dal dimuquraadi ah oo madaxbanaan. Somaliland, waxa ay xornimadeeda ka qaadataay Biritayn 26-kii Juun 1960kii, todobaad keliya ka dib markii ay xorriyadda qaranimo qaadatay qaranimo qaadatay waxay si ikhtiyaarkeeda ah ula midowdey Soomaaliya 1-dii Luulyo, 11960-kii.

Somaliland waxay lahayd dawlad dimuquraadi ah oo xasiloon 30kii sano ee u dambeeyay, waxay tan iyo markii ay dib ula soo noqotay madax-banaanideeda ee ka baxday midowgii fashilmay ee Soomaaliya 1991kii, ku socotaa dhabbaha dib u heshiisiinta, dib u dhiska iyo horumarinta bulshada, siyaasadda, dhaqaalaha iyo horumarka oo gudaha wadanka ka abuurantay.

Somaliland waxay raadinaysaa aqoonsi caalami ah si ay xubin uga noqoto waddamada caalamka, isla markaana ay si togan wax ugu soo kordhiso. Somaliland waxay buuxisay dhammaan shuruudihii looga baahnaa dawladnimada marka loo eego shuruucda caalamiga ah.

Badka dhulka Somaliland baaxadiisu waa 176,120 kiiloomitir oo isku wareeg ah. Dalku waxa uu leeyahay xeeb dhererkeedu dhan yahay 850 kiiloomitir, oo galbeed ka gaadhsiisan Jabuuti, koonfurtana Itoobiya, dhinaca bari waxa ka xigta Soomaaliya iyo Gacanka Cadmeed oo waqooyi ka xiga. Oogada sare ee dalku waxa uu u qaybsan yahay saddex qaybood oo waaweyn oo hanaan-kalasarayneed, oo u kala qaybsan dhidibka bari-galbeed oo loo yaqaan Oogo, Guban iyo dhulka siman ee Hawd. Sanadkii 2020-ka Somaliland waxa lagu qiyaasay inay ku nool yihiin dad dhan 4.2 milyan.

Si loo xaqiijiyo kobaca dhaqaalaha iyo horumarka iyo hore u socodka bulshada, Somaliland waxay bilawday dadaalo lagu hagaajinayo jawiga siyaasadda, sharci-dejinta iyo xeer-nidaaminta si loo abuuro jawi suuragelinaya in la soo jiito maal-gashi shisheeye iyo dhaqaale dalka soo gala. Awoodda waddanku u leeyahay iskudabaridka dakhliga, qoondaynta iyo xisaabinta dhaqaalaha dawladda ayaa aad u horumartay. Intaa waxa dheer, waddanku wuxuu sii wadaa inuu la shaqeeyo saaxiibo iskaashi oo kala duwan oo caalamiga ah, iyada oo tani qayb ka tahay dadaalka in Somaliland ugu jirto in ay noqoto mid u diyaarsan maalgashiyo gaar loo leeyahay oo shiisheeye.

Dib u eegista iyo hagaajinta nidaamyadan hanaanka jawiga maalgashigu wuxuu siyaabo badan u xaqiijinaya jawi shaqo oo waddanku leeyahay, oo ka dhigayaa mid saaxiibtinimo leh, tartan geli kara, xasilloon, daahfuran oo loo simanyahay.

Somaliland waxa ay leedahay dhul-jiyooloojiyeed ku haboon kheyraadka macdanta iyo helida kaydad macdaneed oo heer caalami ah, iyada oo waddanku ku teedsan yahay taxanaha buuraha Mozambique oo qani ku ah helida kaydadka macdanaha isku-qurxinta (gemstones) ee kala duwan kuwaas oo qiimahoodu aad u sarreeyo, sidoo kale biraha qaaliga ah (precious matels) iyo macdanaha kale ee biraha ah (base minerals). Waxaa jira tuhuno weyn oo kaydad macdaneed ah, sida, Tin, Naxaas (Copper), Tantalite-columbite, Manganese, indha-kuul (Lead), dhagax bireed (iron ore) iyo curiyayaasha ku jira kooxda Platinum (PGE), iyo sidoo kale ciriqyada dahabka laga helo. Waxaa kale oo jira kaydad badan oo macdanta dhismaha loo isticmaalo, sida marmarka (marble), mamaca (Limestone) iyo dolomites. Somaliland waxay leedahay kaydad waaweyn oo dhagax didibka ah (gypsum), kaas oo ka mid ah kaydadka aduunka ugu waaweyn. Dhawaan waxaa sii kordhaya tirada shirkado shisheeye ah iyo kuwa maxalli ahba oo ku hawlan macdan-qodis kooban oo qoda macdanaha isku-qurxinta, naxaasta (Copper), macdanta Jade-ka iyo dahabka.

## 1.2 Macnaha Guud ee Siyaasadda

Macnaha guud ee siyaasaddani waa bayaan qoraal ah oo xusaysa xayndaabka, habraacyadda, mabaadi'da iyo istiraatiijiyadaha Dawladda ku hagi doona maaraynta aaga macdanta iyo macdan-qodista, taas oo keeni doonta koboc dhaqaale iyo mid dhaqaale-bulsheedba.

Siyaasadani waxay ku qotontaa sidii Khayraadka macdanta loo intifaacsado qaab leh joogtayn deegaan iyo masuuliyad bulsho, waxay dhinacyo kala duwan ka horumarin kartaa dhaqaalaha dalka.

Maalgashiga aagaga macdaneed iyada oo la raacayo xeerarka iyo siyaasadaha dalka si ay masuuliyadi ku dheehan tahay, waxaa laga filayaa inuu dhaliyo dakhli badan oo ay dawladdu  ka hesho, kaas oo lagu maalgeliyo kaabayaasha dhismeed iyo kuwa bulsheed, si loo dardargeliyo horumarka hore u socodka bulshada, kobaca dhaqaalaha iyo horumarka guud ee Qaranka.

Distoorka Somaliland 2001waxa uu u  awood usiinaya maamulka  khayraadka macdanta Dawladdadhexe, si ay shacabka Somaliland ugaga masuul ahaato. Waxaa la sameeyey xeer cusub oo macdan-qodista Somaliland, kaas oo leh xeer-nidaamiye awood-siin leh, tan ooqayb ka ah qorshe lagu horumarinayo laguna hagaajinayo qaab dhismeedka dawladda iyo maamulka aaga macdanta iyo macdan-qodista. Hiigsiga Qaranka Somaliland ee 2030 wuxuu macdan-qodista u aqoonsaday mid ka mid ah todobada aag ee ugu mudan , kuwaas oo muhiim u ah hawlaha u qorshaysan horumarinta dhaqaalaha.

Bah-wadaagta macdan-qodistu waa ganacsi caalami ah oo ku lug leh maalgashiyo, hanaan maalgelineed iyo suuqyo macdaneed oo iskudhafan oo caalami ah, sidaa darteed, waxaa loo baahan yahay in siyaasaddan laga dhigo mid ka turjumaysa duruufaha caalamiga ah, kuwa mandaqaddeed iyo kuwa maxalliga ahba. Marka la eego heerka Qaarad ahaaneed, Madaxda Afrika iyo Dawladahoodu waxay qaateen Hiigsiga Macdan-qodista Afrika oo 2030, kaas oo ah qoraal sugan oo ujeedkiisu yahay ka dhigidda macdan-qodista horseede muhiim u ah dhaqaajinta horumarka dhaqaale-bulsho ee Afrika. Siyaasaddan waxaa laga tixraacay oo ay ku qotontaa Hiigsiga Macdan-qodista Afrika (AMV).

## 1.3 Ujeedooyinka Siyaasadda iyo Mabaadii'da Hagaya

Qodobbada soo socda ayaa loo soo xulay inay noqdaan ujeedooyinka siyaasadeed ee muhiimka u ah iyo mabaadi'da hagaya Siyaasadda Macdanta iyo Macdan-qodista Somaliland:

- In la kordhiyo faa'iidada dhaqaale ee qaranku ka helayo khayraadka macdanta kaas oo loo adeegsanyo abuuridda ilo-dhaqaale oo waara.
- Kobcinta dakhliga kasoo xerooda macdanta iyada oo loo marayo ururinta cashuuraha, ajuurooyinka, khidmadaha iyo kharashaadka kale.
- In si siman uga faaiidaystaan muwaadininta Somaliland khayraadka macdanta.
- Ilaalinta badqabka deegaanka iyo tixgelinta fayodhawrka caafimaadka shaqaalaha ka shaqeeya soo saarista khayraadka macdanta.
- Tayaynta iyo xoojinta iskaashiga hay’adaha ka shaqeeya maamulka iyo soo saarista khayraadka macdanta.
- Helitaanka macdan soo saaris loo siman yahay oo daah-furan iyo faa'iido wadaagga khayraadka macdanta.
- Xoojinta is-fahanka ka dhexeeya shirkaddaha macdan-qodista ka shaqeeya iyo bulshooyinka ay saamaynayso macdan-qodistu.
- Abuurida xog cilmiyeedka jiyoolaji ee dalka si loo dardargeliyo maalgashiga iyada oo loo marayo ururinta iyo habaynta xogaha, turjumaada iyo soo bandhigida xogaha macdaneed.

- Xaqiijinta daahfurnaanta, ka qaybgalka dadweynaha iyo isla xisaabtanka ee arrimaha macdanta.
- Horumarinta xidhiidhka toosan iyo ka dadban ee ka dhexeeya hayádaha ka shaqeeye arrimaha dhaqaalaha.
- Dejinta istaraatiijiyadda suuq geynta iyo qiime ku kordhinta macdanta
- Rasmiyeynta iyo taageeridda hawlgalada Shirkaddaha Macdan-qodista qadiimiga ah(Artisanal Mining) iyo Shirkaddaha Macdan-qodista Kooban (Small-scale Mining)
- Dejinta siyaasado iyo xeerar fududaynaya daahfurnaanta maalgashiyo, si ay faa'iido uga hesho Dawladdu, maalgashidayaasha iyo bulshooyinka ay saameeyaan hawlaha macdan qodista.
- Dhiirrigelinta ka qaybqaadashada muwaadiniinta reer Somaliland ee bixinta adeegyada iibinta alaabaha wadanka gudihiisa laga heli karo, sidoo kale shaqaalaysiinta iyo tababaridda muwaadiniinta reer Somaliland.

## 1.4. Halka ay Siyaasaddu ku Qotonto

### 1.4.1.Hiigsiga Qaranka Somaliland ee 2030

Tan iyo xiligii uu bilaabmay sanadkii 2011, Hiigsiga Qaranka Somaliland ee 2030, waxa uu yagleelay yoolal la wada leeyahay oo la xidhiidha mustaqbalka Somaliland oo dalka awood u siinaya iyo in uu awood u helo in uu yeesho qorsheyaashiisa horumarineed. Hiigsigu wuxuu sii wadaa in qaranka iyo hogaankiisa ku yididiilo geliyo in lagu raadjoogo jiho horumar oo ku qotonta dal xasiloon, dimiquraadi ah oo barwaaqo ah.

Aragtidan ayaa awood u siinaysa abaabulka ilaha kheyraadka iyo siyaabaha looga gudbi karo caqabadaha horumarineed ee loogu talagalay in lagu dhimo faqriga, laguna helo nolol heerkeedu sareeyo. Laamaanayaasha iskaashiga Horumarineed waxa laga filayaa in ay taageeradooda iyo waxqabadkooda waafajiyaan mudnaanaha iyo yididiilooyinka qaranka.

Aaga Macdan-qodistu ayaa ka mid ah todobada aag ee loo aqoonsaday inay muhiim u yihiin hawlaha u qorshaysan horumarinta Somaliland. HiigsigaSomaliland wuxuu saadaalinayaa aasaasidda waddan leh aag macdan-qodis oo xoogan oo manaafacaadsada khayraadka macdanta ee dalku qaniga ku yahay iyo in la dardargeliyo koboc dhaqaale oo ka qaybqaata korodhka dakhliga iyo horumarka guud.

## 1.4.2 Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP)

Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) ayaa dejinaya habkii lagu gaadhi lahaa dhimista faqriga iyada oo loo marayo fursadaha dhaqaale iyo maalgelinno isku xidhan oo ku wajahan dhalinyarada, adeegyada bulshada, wax soo saarka iyo kaabayaasha. Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) waxa kale oo looga golleeyahay in la kordhiyo u adkeysiga saameynta doorsoonka cimilada iyada oo loo marayo hagaajinta hab-maamulka deegaanka, biyaha dalka oo loo maamulo qaab istiraatiiji ah, haqab-beelka cuntada iyo dhaqaale dhinacyo badan ku tiirsan. Intaa waxaa dheer, Qorshaha Horumarinta Qaranku (NDP) wuxuu ku qotomaa baahida loo qabo in la hubiyo dhawridda xuquuqda aadanaha ee muwaadin kasta iyada oo loo marayo hanaan maamul wanaag, u sinnaanta helitaanka adeegyada bulshada iyo ka wada qayb noqoshada dhaqaalaha.

Qorshaha Horumarinta Qaranka II (NDPII) waxa uu u aqoonsan yahay aagaga wax-soo-saarka Macdanta iyo Shidaalku inay yihiin aasaas lama huraan u ah horumarka dhaqaale-bulsheed ee Somaliland ee xilliga hadda lagu jiro iyo mustaqbalkaba. Iyada oo dhammaan tiirarka dhaqaale iyo aagaga la xidhiidhaaba ay Somaliland u leeyihiin ahmiyad siman, haddana Dawladdu waxay u aqoonsatay aagaga wax soo wax-soo-saarka ee macdanta iyo shidaalka, gaar ahaan macdanta iyo macdan-qodistu inay yihiin kuwa ugu lama huraansan ee lagu xaqiijinayo yididiilooyinka qaranku u leeyahay ee hiigsanaya dhaqaale dhinacyo badan ku tiirsan iyo koboc dhaqaale oo degdeg ah.
Ujeedada Siyaasaddan Macdanta iyo Macdan-qodista oo ay weheliso Xeerka cusub ee Macdan-qodista Somaliland iyo Xeer-nidaamiyeyaasha Macdan-qodista ayaa ah in la helo xayndaab-habraac, sharci-dejin iyo xeer-nidaamineed oo looga dan leeyahay in si mug leh loo horumariyo korna loogu qaado hannaanka maamul ee macdan-qodistata Somaliland.

Siyaasaddan guud ee macdanta iyo macdan-qodista waxaa looga dan leeyahay ka guurista in arimaha aaga macdan-qodista wax looga qabto qaab marba wixii markaa yimaada ah. Siyaasadda Macdan-qodista ayaa la filayaa inay wax ka qabato caqabadaha hortaagan aaga macdanta iyo macdan-qodista Somaliland, oo ay ka mid yihiin, saadaalin la’aan iyo hubanti la’aanta, taas oo markaa keenta maalgashi hooseeya oo dhinaca aaga macdan-qodista ah. Sidaa darteed siyaasadda ayaa laga filayaa inay hagitaan cad ka bixiso kheyraadka macdanta Somaliland inay tahay mid la joogtayn karo oo faa’iido iyo manaafacaadsi leh.

Siyaasaddani waxa ay wax ka qaban doontaa goldaloolooyinka ka jira aaga macdan-qodista, waxaanay jihada istiraatijiyeed ee bah-wadaagta macdanta la jaanqaadsiin doontaa Dastuurka Somaliland, Hiigsiga Qaranka Somaliland 2030, Qorshaha Horumarinta Qaranka Somaliland (NDP) iyo Aragtida Macdanta Afrika iyo sidoo kale hab-hawleedyada ugu wanagsan ee bah-wadaagta macdan-qodista ee dunida. Waxaa kale oo looga golleeyahay in la xoojiyo xayndaab-habraaca hay'addeed ee aaga macdanta iyo macdan-qodista, wax ka qabashada maamulka iyo arrimaha hawlgallada macdanta iyo sidoo kale ilaalinta badqabka deegaanka, sinnaanta, qiime-ku-kordhinta macdanta, hawlaha soo xidhida goob-macdaneedka, kor u qaadida awoodda aqooneed ee shaqaalaha iyo farsamada macdan-qodista caamka ah ee qadiimiga ah iyo macdan-qodista kooban (small scale and artisanal mining). Siyaasaddani waxay u ololayn doontaa isticmaalka tignoolajiyada ku haboon macdan-qodista, oo ay ka mid tahay tignoolajiyada Juquraafi-dhuleed (geo-spatial) iyo sahaminta xagga circa ah ee jiyofiisikalka ahba, si kor loogu qaado helida macluumaadka ku saabsan macdanta dalka, isla markaana kor loogu qaado maalgashiga aaga macdanta iyo macdan-qodista.





# Cutubka

# 02

# Falan Qaynta Siyaasadda

## 2.1 Arrimaha Dhaqaalaha, Horumarinta Kaabayaasha iyo waxyaalaha kale ee kaabaya

Labaatankii sannadood ee la soo dhaafay, dhaqaalaha Somaliland waxaa ku yimi isbedel muhiim ah. Xoolaha nool oo ahaa dhaqan ahaan aaga ugu badan dhaqaalaha dalka waxaa la soo derdey caqabado joogto ah oo ay ku jiraan masiiboyin kala duwan oo isugu jira kuwa dabiiciga ah iyo kuwo dad-samee ahba. Dhinacyada caqabadaha ku ah xoolaha nool waxaa ka mid ah abaaraha soo noqnoqda oo sii badanaya, kuwaas oo ka dhashay doorsoonka cimilada iyo sidoo kale xayiraado kaga yimi suuqyaddii ugu weynaa ee loo dhoofin jirey. In kasta oo dhoofinta xoolaha nool ay weli tahay lafdhabarta dhaqaalaha, iyada oo ah wax ku dhow saddex meelood meel wadarta dakhliga Dawladda, waxaa jirtey isbedel siyaasaddeed iyo dariiq horumarin dhaqaale oo u gogol xaadhaya baahinta/kala duduwidda dhaqaalaha.

Tani waxay keentay samaysanka aagag iyo bah-wadaagyo cusub oo kala duwan, oo ay ka mid yihiin isgaadhsiinta, dhismaah/iibinta iyo kiraynta hantiyaha iyo aagag kale oo adeeg oo ah kuwo ka adkaysi badan. Inkasta oo horumarkoodu uu ka yar yahay marka loo eego aagaga kale, wax soo saarka beeraha iyo kaluumaysiga ayaa ayaa ka mid ah aagaga kale ee xilliga hadda ah soo jiidanaya maalgashiga gaarka loo leeyahay. Sidoo kale waxaa dib u soo cusboonaaday dhoofinta fooxa, malmalka iyo xabkaha, kuwaas oo dhaqan ahaan ahaa badaaceedaha aad looga dhoofiyo gobollada bariga ee dalka.

Meesha istiraatijiga ah ee ay Somaliland ku taal oo ah Gacanka Cadmeed iyo u dhowaanshaheeda marinkaBab El Mandab, oo ay maraan saddex meelood meel ahaan gaadiidka badaha iyo ganacsiga xagga badda ee caalamka ayaa Somaliland ka dhigaysa meel leh soo jiidhaso ganacsi iyo maalgashi. Iyada oo ay keentay meesha isteraatijiga ah ee ay ku taal, Somaliland waxay soo jiidatey heshiisyo horumarineed iyo ganacsi oo waaweyn. Sannadkii 2012 Dawladda Somaliland waxay bixisay ruqsado sahamin shiidaal oo ay siisay afar shirkadood oo kala ah Genel Energy, Plc (UK-Turkey), DNO International, OSA (Norway), RAK Gas, LLC (UAE) and Ansan WIKFS.

### 2.1.1 Kaabayaasha dhaqaalaha

Dhaqaalaha Somaliland wuxuu ku suntan yahay oo ku shaqeeyaa mabaadii dhaqaale oo furfuran, ganacsi xor ah, tartan iyo faragelinta shuruucda iyo Dawladda oo kooban, si aan loo carqaladdayn firfircoonidiisa iyo kobociisa.Dawladdu waxay u fududaysay maalgashadayaasha ajaanibka ah inay dalka ka sameeyaan ganacsi, ka baayacmushtareeyaan, ayna dibedda ula baxi karaan faa'iidada iyo raasamaalka.

Sannadkii 2016-kii, Dubai Port(DP) World ayaa la siiyey ruqsad 30 sannadood ah oo ay ku waasicinayso, ku casriyeynayso kuna maamulayso Dekedda Berbera heshiis maalgashi oo lagu qiiyaasay 442 Milyan oo Doolarka Maraykanka ah. Heshiiska lala galay DP World waxaa ku jirey samaynta Marin-dhuleedka Bebera (Berbera Corridor) oo isku xidhaya dekedda Berbera iyo xuduudka Itoobiya. Mashruucani si fiican ayuu hadda u socdaa.

Heshiisyo dhinacyo badan iyo kuwo laba-geesood ah oo caawimo bixin iyo iskaashi isteraatijiyaddeed oo ay ka mid yihiin Isutagga Imaaraadka Carabta iyo caawimo bixiyayaasha kale ee laba-geesoodka ah ayaa bixiyey gargaar kudo dheer ah oo ku wajahan suuq u helitaanka iyo abuuridda suuq tartan-gal ah, joogtaysan oo loo dhan yahay.

Somaliland waxaa ka shaqeeya tiro diyaarado caalami ah, kuwaas oo sameeya duulimaadyo maalinle ah oo ka duula Hargyesa una duula caasimado kala duwan. Dhinaca kale, dawladdu, iyada oo caawimo ka helaysa wadamada ay iskaashiga leeyihiin waxay samaynaysaa maalgashi ku wajahan jidadka, dekedaha, iyo garoomada diyaaradaha iyada oo sidoo kalena awood la siinayo, loona fududaynayo fiditaan gaar ah isgaadhsiinta iyo kaabayaasha kale ee macluumaadka kombiyuutaradda la xidhiidha (ICT).



## 2.2 Xeerka iyo Xeer-nidaamiyayaasha Macdanta

Somaliland hore uma lahayn siyaasad macdan iyo macdan qodis la xidhiidha. Siyaasaddan macdanta iyo macdan-qodista ujeedadeeda ugu weyni waa in kor loo

qaado faa'iidooyinka dhaqaale ee qaran ee laga helayo horumarinta khayraadka macdanta ee qaranka. Dhawrkii sannadood ee la soo dhaafay, Wasaaradda Tamarta iyo Macdantu waxay ku dhaqaaqday samaynta xeer macdan qodis oo qaran iyo xeer-nidaamiyayaal ka farcama xeerka.

Xeerka macdanta waxaa loo qaabeeyey inuu noqdo mid xidhiidh la leh baahiyaha aagaga macdan-qodista ee casriga ah, waxaana looga dan leeyahay in lagu hagaajiyo qaabka maamulidda macdan-qodista. Ujeedadu waa in la helo hanaan macdan qodiseed oo daah-furan, xasiloon oo la saadaalin karo, kaas oo soo jiidasho u leh maalgashadayaasha waddanka gudihiisa iyo kuwa caalamka labadaba, isla markaana kor u qaada dakhliga dawladda.

Xeerka iyo Xeer-nidaamiyayaasha cusub ee macdan-qodista waxaa loo qaabeeyey inay wax ka taraan baahiyaha iyo jihooyinka bah-wadaagta macdan-qodista ee isbedbedelaya iyo sidoo kale inay waafaqsanaadaan hanaan-hawleedyada ugu wanaagasan ee caalamka. Intaa waxaa dheer in xeerku uu wax ka qabanayo qaab-sharciyeedkii hore ee macdanta iyo macdan-qodista, kaas oo macdano khaas ah ka reebayey awooda maamulid ee xeerka macdanta, sida macdanaha dhismaha, cusbooyinka iyo macdanaha gaasta leh.

Xilligii la soo dhaafay, hanaanka bixinta ruqsaduhu waxay ku salaysnayd hab-raac maarayneed oo hadba sidii loogu baahdo ah iyo awooddo kala doorasho oo Maamulka ruqsad bixinaya. Ma aanay jirin hagayaal qeexan oo la xidhiidha wakhtiga ruqsad bixinta, hubinta awoodda farsamo iyo dhaqaale ee dalbadayaasha doonaya inay sameeyaan hawlgallo macdan baadhista iyo macdan-qodista. Qaababka loola socdodhinaca caafimaadka iyo badbaadada oo ay ku jiraan soo xidhidda goobta macdan qodista iyo isticmaalka waxyaalaha qarxa iyo ilaalinta deegaanku waxay ahaayeen kuwo liita ama aan jirinba.. Tani waxay dhalisay in hanaanku u furnaado saamaynta ka ganacsadayaal iibsada ama xuquuqda macdanaha u hela inay ka sameeyaan dhaqaale.

Xilligii la soo dhaafay, hanaanka bixinta ruqsaduhu waxay ku salaysnayd hab-raac maarayneed oo hadba sidii loogu baahdo ah iyo awooddo kala doorasho oo Maamulka ruqsad bixinaya. Ma aanay jirin hagayaal qeexan oo la xidhiidha wakhtiga ruqsad bixinta, hubinta awoodda farsamo iyo dhaqaale ee dalbadayaasha doonaya inay sameeyaan hawlgallo macdan baadhista iyo macdan-qodista. Qaababka loola socdodhinaca caafimaadka iyo badbaadada oo ay ku jiraan soo xidhidda goobta macdan qodista iyo isticmaalka waxyaalaha qarxa iyo ilaalinta deegaanku waxay ahaayeen kuwo liita ama aan jirinba.. Tani waxay dhalisay in hanaanku u furnaado saamaynta ka ganacsadayaal iibsada ama xuquuqda macdanaha u hela inay ka sameeyaan dhaqaale.

Arimaha ugu muhiimsan ee xeerka cusub ee macdan-qodistu soo kordhiyey waxaa ka mid ah xayndaab-habraaca qaybsiga ajuurada oo afar derajo ah oo u dhexeeya heerar kala duwan oo dawladda ah (Dawladda dhexe, gobolada iyo degmooyinka) iyo bulshada goobaha macdan-qodista. Intaa waxaa dheer, badbaado ilaalin la qeexay oo la xidhiidha ka qaybqaadashada waddanka (shaqo-gelinta iyo tababarada muwaadiniinta Somaliland iyo sidoo kale ka isticmaalidda qalabka iyo adeegyada waddanka gudihiisa laga bixiyo) ayaa lagu soo kordhiyey Xeerka. Intaa waxaa dheer, masuuliyadda shirkadaha ka saaran bulshada (corporate social responsibility, CSR) waxaa xeerka macdanta ka dhigay waajibaad sharci ah, waxaana la siiyey qaab-dhismeed qeexan. CSR dib ayaa loo qaabeeyey si ay u noqoto heshiisyo horumarin bulsho (community development agreements, CDA-s) kuwaas oo ah heshiisyo rasmi ah oo ay wadagelayaan dawladda (Wasaaradda masuulka ka ah macdanta iyo macdan-qodista), shirkadaha macdan-qodista iyo bulshooyinka ay macdan-qodistu saamaynayso. Heshiisyada horumarinta bulshadu (CDA-s), waxay shirkadaha macdan-qodista ku waajibinayaan inay boqolkiiba hal (1%) oo ah dhakhligooda guud ee sannadkii ama xaddi lacageed oo laysla qaatay u qoondeeyaan bulshooyinka ay hawlgallada macdan-qodistu si toos ah u saameeyaan. Dhinaca kale waxaa la sameeyey sagaal iyo toban (19) xeer-nidaamiye oo macdan-qodista la xidhiidha si loo suurtageliyo fulinta iyo dhaqangalnimada Xeerka Macdanta Somaliland.

## 2.3. Helitaanka Dhulka si loogu hirgeliyo Macdan baadhis iyo Macdan qodis

Dastuurka Somaliland wuxuu macdanta masuul uga dhigay Dawladda dhexe, sidaa oo ay tahay wuxuu oggoladaa xuquuqo hantiyeed, hawlgallada macdanta waxaa laga fuliyaa oogada, gudaha iyo/ama xagga hoose ee dhulka. Hase yeeshee, wixii la xidhiidha hawlaha macdanta iyo macdan-qodista, Xeerka Macdanta ayaa nasakhaya dhammaan xeerarka kale ee isticmaalka dhulka. Xeerka Macdanta wuxuu tixgelin dheeraad ah siiyaa dhulal leh ilaalin seerayn dheeraad ah sida goobaha dhaqanka iyo hiddaha, goobaha diimeed, seerayaasha iyo kaymaha qaranka, ceshiimooyinka iyo seeraha ugaadha ee qaranka, meelaha biyo-qabadka iwm. Goobahaas guud ahaan way ka reeban yihiin bixinta xuquuqaha heshiisyada macdanaha.

Xeerka iyo Xeer-nidaamiyayaashaMacdan-qodistu wuxuu hubinayaan:


- ·Dalabasho cadaalad ah oo la xidhiidha helitaanka xuquuqo dhuleed oo hawlo macdaneed iyo waajibaadka la xidhiidha dib u dejinta mulkiilayaasha dhulka iyo deganaanshaha sharciga ah.

- Hanaanno la raaco oo daah-furan lana, saadaalin karo oo ku wajahan qiimaynta dacwadaha macdhawga iyo khilaafyada la xidhiidha magdhawga.
- Wadanoolaansho xasiloon oo ka dhaxaysa dhul isticmaalayaasha kala duwan, sida macdan qodatada iyo noocyada kale ee dhaqaalaha la xidhiidha, gaar ahaan beeraha (beerista dalaga iyo reer guuraaga – beer falatooyinka) iyo kaymahaba.

## 2.4 Xogta iyo Macluumaadka Cilmiga dhulka

Siyaasaddani waxay ku dedaalaysaa inay hagto dheefsiga khayraadka macdanneed oosi baaxad leh, daahfuran, oo cadaalad ah, si loogu guulaysto koboc joogtaysan iyo horumar dhaqan-dhaqaale. Waxaa loo qaabeeyey inay taageerto oo wax ka qabato waxyaalaha isku xidh-xidhan ee dhinacyada badan leh ee u baahan in la xaliyo si loo sameeyo horumarin khayraad macdanneed. Sidaa darteed, la iska indho tiri karo baahida loo qabo macluumaadka Cilmiga dhulka iyo qaababka dhulka oo ku wajahan hab-maamulka iyo horumarinta aaga macadnta.

Inkasta oo jiyoolojiga Somaliland uu yahay mid qani ah, dalkuna uu leeyahay khayraad badan oo macdanneed, haddana ilaa hadda lama baadhin lamana intifaacsan, iyada oo sababta ugu weyn ee taas keentayna ay tahay liidashada ay liidato maalgashiga ku wajahan helidda, ka hufidda iyo baahinta xogaha jiyoolojiyeed iyo macdanneed ee dalka. Liidashada jiritaanka xog jiyoolojiyeed ayaa ah caqabaddaha ugu waaweyn ee hortaagan soo jiidashada maalgashi lagu sameeyo aaga macdanta. Kor u qaadidda xogta jiyoolojiyeed iyo hanaanka macluumaadka macdan-qodista, si ay u xoojiso maalgashiga sahaminta iyo macdan-qodista ayaa muhiim u ah in la ibo-furo fursadaha khayraadka macdanneed ee Somaliland iyo in aaga macdanta loo soo jiido maalgashi.



## 2.5 Suuq-Geynta iyo Qiime u Kordhinta Macdanta

Somaliland waxay qani ku tahay khayraad macdanneed oo isugu jira dhagxaanta qaaliga ah ee qurux ahaanta loo isticmaalo (gemstones), macdan-bireedyada qaaliga ah, biraha aasaasiga ah, macdanaha wershadaha iyo dhismaha iyo kuwo kale. Tani waxay daruuri ka dhigaysaa in siyaasaddu diiradda saarto horumarinta iyo u ololaynta bah-wadaagta khayraadka dhulka laga soo saaro iyo qiime ku kordhinta macdanta, maadaama ay jirto fursad macdanahaasi ku soo saaraan dhaqaale, isla markaana ay qayb ka qaataan isbedel wanaagsan oo xagga dhaqaale-bulsho ee dalka. Hase yeeshee manaafacaadsigoodu wuu koobnaa, wuxuuna inta badan ku salaysan yahay soo saaridda la dhoofiyo iyada oo aan lagu samayn wax sifayn ah oo dheeraad ah, si qiime loogu kordhiyo, iyada oo macdanahaas laga dhigayo qaab si heer sare ama marxalad dhexe ah loo sifeeyey ama laga dhigay heerkii ugu dambeeyey ee saafiga ahaa.

Dedaalka Somaliland ee ku aaddan dardar gelinta maalgashiga aaga khayraadka dhulka la gala soo baxo wuxuu la kulmaa caqabado badan, oo ay ku jiraan;

- Jiritaan la'aanta macluumaad dhammaystiran oo la xidhiidha khayraadka macdanta
- Yaraanta awooda dhaqaale, xirfaddeed iyo tiknoolojiyeed.

Sidaa darteed waxaa diiradda la saaray abuurista barnaamij halbeeg oo ujeedadiisu tahay in kor loogu qaado shuruucda iyo horumarinta khayraadka dhulka laga soo saaro iyo bah-wadaagta weshadaynta macdanta, iyada oo ay ku lamaan tahay in la hubiyo hanaan wershaddeedyo dalka ka hirgala oo isku dhafan, dhaqaale soo saara, isla markaana si isu miisaaman waddanka ugu baahsan.

Xilliga hadda ah, waddanku wuxuu leeyahay istaraatijiyad kooban ama gebi ahaanba ma laha wax istaraatijiyad ah oo ku wajahan suuqgeynta, dardargelinta iyo qiime-ku-kordhinta macdanta. Macdanaha kooban ee la qodo waxaa ladhoofiyaa iyaga oo macdantii oo caydhiin ah, sidaa darteedna dalku kama helo xaddigii lacageed ee ugu badnaa ee uu ka heli karey khayraadkiisa macdanta. Heerka hoose ee qiimaha macdanta waxaa sabab u ah aqoon la'aanta, horumar la'aanta bah-wadaagta wershadaynta macdanta, jiritaan la'aanta tiknoolojiyad ku haboon iyo kharashka quwadda tamarta oo saraysa. Waxaa jirey iskudayo kooban oo ku wajahan qiimayn u samayn, dardargelin iyo suuqgeyn lagu sameeyo macdanta dalka, oo ah heer qaran, mandaqaddeed iyo mid caalami ahba, kuwaas oo ah dhamaman suuqyada la doorbidayo in macdan-qodistu ku wajahnaato.

## 2.6 Horumarinta Awoodda Hay'addeed iyo Awoodda Qofeed

Dawladda Somaliland waxay aqoonsatay doorka muhiimka ah ee horumarinta awooda hay'addeed iyo ta qofeed, si ay qayb ugu qaataan kor u qaadidda horumarka dhaqaale ee dalka. Tan waxaa lagu muujiyey taxane is bedello ah oo ay ku dhaqaaqday Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, kuwaas oo isugu biyo shubtay samayntii Xeerka Macdanta Somaliland, iyo xeer-nidaamiyayaashaka farcama iyo sidoo kale siyaasadda Macdan-qodista Somaliland. Ficiladaa muhiimka ah waxay awood siinayaan horumarinta awoodda dawladnimo, waxaana xoojinaya rasmi ka dhigidda hawlaha macdan la soo bixidda habka qadiimiga ah iyo macdan-qodista kooban (artisanal and small scale mining) iyo dardargelinta ka qaybqaadashada muwaadiniinta ee hawlaha macdanta.

Xidhiidhka ka dhexeeya horumarinta awooddeed iyo yaraynta saboolnimada ayaa ah mid si fiican loo aqoonsaday. Horumarinta awoodda hay'addeed lagama maarmaan uma aha horumarinta qaranka oo keliya laakiin waxay sidoo kale lagama maarmaan u tahay ku guulaysiga Hadafyada Horumar Waara (Sustainable Development Goals, SDGs).

Qaabab maamul-wanaag oo toolmoon, xirfadaha shaqaalaha iyo kartida ururada maamulaya aaga macdanta iyo macdan-qodista ayaa muhiim u ah in si midhodhal leh loogu dabakho xayndaab-habraac oo shuruuc iyo xeer-nidaamiyayaal. Daah-furnaan heerkeedu sareeyo ayaa fure u ah soo jiidashada iyo sii hanashada maalgelin aaga macdanta ah oo kor loo qaaday.

Waxyaabaha ugu waaweyn ee la xidhiidha horumarinta awoodda hay'addeed waxa ka mid ah:

- Awood kobcinta Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta si dib loogu qaabeeyo loona xoojiyo dhaqan gelinta shuruucda macdan-qodista. Tan waxaa ku jira isku dubaridka hawlaha ka socda aaga iyo shaqaale cusub u qaadashada qaybaha muhiimka ah ee farsamada iyo maaraynta macdanata, tababaridda shaqaalaha, dejinta hanaanno iyo hab-raacyada cusub ee shaqada, iyo sidoo kale helitaanka qalabka iyo dib-u-casriyaynta xarumaha.
- Hanaanno-xogeed hagaagsan oo kumbiyuutar ku salaysan oo ay ku jiraan qaybta shaqada xaga dambe ka tababtaabinaya, faylal u samayn, iyo diiwaangelin kaydiyaha ruqsadaha xuquuqaha macdanaha oo kumbiyuutar ku salaysan. Ugu dambayn, yoolku waa in la aasaaso nidaam online ah oo internet ku shaqeeya oo laga heli karo xogta macdan iyo macdan-qodis oo ganacsi gal ah, isla markaana dhammaystiran oo si fiicana u shaqaynaysa.

- In la aasaaso kaabayaal xagga cilmiga dhulka ah oo ay ku jiraan diyaarinta khariiraddo cilmiga dhulka ah oo kombuyuutaraysan (digital) ah iyo samaynta kayd-xogeed lagu kordhiyo/lagu cusboonaysiiyo macluumaadka ciliga dhulka ee hadba soo baxa.
- Sahano jiyofiisikal oo xagga cirka ah oo caawiya samaynta khariiraddaha cilmiga dhulka ayaa la fulin doonaa, iyada oo ay ku jirto qayb ah sifaynta kamadambaysta ah iyo daabacaada khariiraddo dhigital ah.
- Hanaanno maamulid deegaan, si kor loogu qaado dhisidda heerka kartida aqooneed ee Wasaaradda ee ku wajahan la socodka iyo dhaqangelinta xeerarka macdanta iyada oo xidhiidh lala yeelanayo Wasaaradda Deegaanka.

Somaliland waa inay sidii hore si ka badan tartan ugu gashaa soo jiidashada dhaqaale lagu maalgashado si ay u joogteyso bah-wadaagteeda macdanta iyo biraha. Jawigan isaga ah, dhammaan wasaaraddaha dawladdu waa inay ka wada shaqeeyaan in ay hubiyaan in la joogteeyo jawi maalgashi oo wanaagsan. Sidaa darteedna waa in Dawladdu samaysaa u heelanaan ku wajahan dhinacyada dhaqaalaha iyo cashuuraha, sharicyo wax ku ool ah iyo u ololayn maalgashi iyo wax dhoofin.

Aaga macdan-qodistu waa aag aad ula xidhiidha farsamo oo u baahan xirfado khaas ah iyo hay'ado si wax ku ool ah u qaabaysan una qalabaysan. Wakhtiga hadda la joogo, qaadista xogaha iyo shariciyaynta bah-wadaagta macdantu waxay wada hoos yimaadaan hal waax (Macdan-qodista iyo cilmiga dhulka). Qorshahani wuxuu wiiqayaa wax ku oolnimada iyo in sida ugu wanaagsan wax loo qabto, maadaama labada waajibaad ay la kulmaan caqabado kala gedisan. Qorshaha hadda jira waxa aanu sidoo kale lahayn hay'ado khuseeya oo caawiya, sidaa darteedna wuxuu saamayn ku yeeshaa dhaqangelinta, u hogaansanka iyo adeeg bixinta.

Mudo dheer dalku ma lahayn hay'addo tababar oo xagga macdan-qodista iyo aagaga la xidhiidha ah. Tani waxay keentay in ay aagan ka jirto dhinaansho ka xagga kartida xirfadeed iyo aqooneed, maadaama inta yar ee dalka dibadiisa lagu tababarayna ay dulmane u noqdeed maskax miirasho oo dalka dibadiisa u shaqo tageen. Tan waxaa sii xoojiyey xaqiiqada ah in bah-wadaagta macdantu aan si fiican loo dhiirigelin.

## 2.7 Joogteynta Baadhitaanka Khayraadka Macdanta

Iyada oo ay sabab u tahay isbedelada koboca dhaqaale ee wadammo badan oo dunida ah, kuwaas oo khayraadka dabiiciga ah u isticmaalay si xawli leh oo aan xakamaysnayn, baahida daruuriga ah ee loo qabo in la yareeyo arimahaas aan wanaagsanayn ayaa waxay noqotay waxa maskaxda lagu hayey markii siyaasaddan la dajinayey, iyada oo loo marayoinkhayraadka dabiiciga ah si waari karta looga faa'iideysto oo ay ku jiraan macdantu, Astaantan ujeedadeeda siyaasadeed waxay ku wajahan tahay in noloshu sii socon doonto, isla markaana la hubinayo baahida aasaasiga ah ee dhammaan dadka iyo jiilasha mustaqbalka iyada oo loo marayo horumarin waarta oo dhinaca khayraadka dabiiciga ah.

Fulinta horumarin waarta sida ay ula muuqato siyaasaddan ujeedadeedu waa iskudhafidda hawlaha saddexda dhinac ee muhiimka ah ee soo socda:

- Hawlaha farsamada iyo dhaqaalaha oo lagu hubinayo koboc dhaqaale.
- Nolosha deegaanka, oo lagu hubinayo ilaalinta khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanka.
- Masuuliyadda bulshadeed, taas oo ku lug leh daryeelka shaqaalaha ee goobaha shaqada iyo horumarinta bulshada ee goobaha macdan-qodista.

Horumarka joogtaysan waa hanaan joogto ah mana aha waxqabad wakhti kooban ah, wuxuuna u baahan yahay waxyaabo suurtagelinaya iyo istaraajiyad si loogu guulaysto dhammaan saddexda dhinac ee kor lagu sheegay. Sidaa darteed culayska hal dhinac la saaro waxaa ka dhalanaysa mushkilad dhammaan dhinacyada hawlaha macdan-qodista oo dhan ah.

Koboca dhaqaale ujeedadiisu waa in lagu guulaysto joogtayn waarta oo la xidhiidha xaddigii la qorsheeyey in la soo saaro, iyo in la daboolo baahiyaha macaamiisha iyo sidoo kale in lagu guulaysto awood dhaqaale oo laga helo iibinta macdanaha la soo saaray, iyada oo isla markaana laysu miisaamayo danaha dawladda iyo bulshada.

Ilaalinta khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanka mamcnaheedu waa ka fekeridda dunida iyo ilaalinta khayraadkeeda, iyada oo loo marayo helitaan macquul ah, iyo in wax laga qabto xaalufinta, dedaalladaa oo ku suntan in khayraadka laga ilaaliyo inay dhammaadaan. Tan sidoo kale macnaheedu waa in la qaado talaabooyin yaraynaya raadreebka taban ee hababka kala duwan ee hawlaha la xidhiidha soo saarista khayraadka macdanta, ee loo soo saarayo qaabab kala duwan oo ku yaalla deegaanno jiyoolojiyeed iyo deegaan dabiici ah oo oogada dhulka ah.

Iyada oo laga fekerayo nooca deegaanka macdan-qodista, masuuliyadda bulshadeed waxa loola jeedaa,wax walba oo kale ka mudan waa in la hubiyo oo xaalado shaqo ama badbaado ah, waxay sidoo kale la xidhiidhaa arimaha bulsho ee macdan-qodista, oo ay ku jiraan qoysaska macdan qodayaasha, deegaanka macdan-qodista, bulshada ku dhaqan goobaha macdan-qodista iwm.

Hawl qabad ahaan, hawl kasta oo macdan-qodis ahi, ha yaraato ama ha badnaatee, waxay arbushtaa xaaladda deegaanka ee dabiiciga ah. Isbedeladaas waxaa ku jira kuwo soo socda.

1. Nabaad-guurinta oogada dhulka iyada oo u dhacasa qaab hoos loo qodoyo dhulka, nabaad-guurin daba socota, nabaad-guurin kala googo'an, iyogariir jabaqeed ka dhalatay arimaha macdan-qodista.
2. Isbedelo kala duwan oo biyaha la xidhiidha.
3. Tayo-beelidda carrada,
4. Sii deynta gaas iyo boodh.
5. Dikhow xagga jabaqda ah.

Siyaasaddan waxa u muuqda oo ay ahmiyad siinaysaa baahida ah in la samaayo tiknoolojiyad lagula soo baxo khayraadka macdanta si meesha looga saaro ama loo yareeyo saamaynta taban ee soo saaridda iyo kala safaynta macdanta. Waxay sidaa oo kale ku wajahan tahay dardargelinta samaynta tiknoolojiyad dib loogu hagaajiyo saamaynta macdan-qodista, si dhulka la isticmaalay dib loogu soo celiyo sidiisii hore si dib qaab kale loogu isticmaalo (samaynta iyo fulinta tiknoolojiyo goobaha dib loogu soo celiynayo sidiisii hore macdan-qodista ka dib).

Waa in ahmiyadda la siiyaa hawlaha wershadaha macdan-qodista ee la xidhiidha daryeelka deegaanka dabiiciga ah, kaas oo ah mid ka mid ah masuuliyaddaha bulsheed ee ugu muhiimsan ee shirkadaha ku hawlan macdan-qodista. Dhinaca kale, arimaha caafimaadka iyo badbaadada ee macdan-qodista waxaa ka mid ah arimo is-khuseeya oo dhawr ah, oo ay ka mid yihiin talaabooyin farsamo, bulsho, hay'addeed iyo sharciyeed. Heerkooda iyo derajada fulintoodu waxay abuurtaa wax loo yaqaan hab-hawleedka ugu wanaagsan waxayna saamayn muhiim ah ku leedahay badbaadada.

Nasiib darro, wuu hooseeyaa Wacyiga bulsho ee la xidhiidha in khayraadka macdantu yahay raasamaal aan dib u cusboonaan, sidaa darteedna in kor loo qaado ama wax laga bedelo xaaladda arintan ayaa ah caqabad kale oo weyn iyo mid ay siyaasaddani si muhiim ah diiradda u saarayso.

## 2.8 Dib u Isticmaalidda Macdanaha iyo Biraha

Maadaama ay Somaliland u diyaargarobayso inay ku biirto meelaha macdanaha laga qodo, iyada oo isla markaana la filayo inay kor u kacdo sahaminta iyo manaafacaadsiga macdanta, bah-wadaagta macdanta iyo macdan-qodista waxaa laga filayaa inay door muhiim ah ka qaataan dhaqaalaha Somaliland, iyada oo laga helayo shaqooyin iyo xirfaddo isla markaana ay bulshada u noqoto aasaaska dhaqaale. Waxyaalahaas la filayo in lagu biiriyo dhaqaalahu maaha kuwo la sahashan karo, waayo waxay noqon doonaan qayb muhiim ah oo ka mid ah dhaqaalaha iyo qaab dhismeedka bulshada Somaliland. Marka aynu mustaqbalka hore ugu sii socono, bah-wadaagta macdanta iyo biruha waxaa ku dhici doona isbedel weyn, kaas oo ay keeneen dhawr caqabadood oo ay ka mid yihiin welwelka ugu weyn ee ku saabsan xaaladda deegaankeena dabiiciga ah iyo baahida loo qabo in lagu guulaysto horumar waara.

Siyaasaddani waxay raaci doonataa hab-hawleed mug leh oo wadatashi lala yeesho dhinacyo iyo daneeyayaal kala duwan oo dalka gudihiisa ah, oo ay ka mid yihiin hay'ado kala duwan oo dawladdeed, xubnaha bah-wadaagta aaga macdanta, ururada dadweynaha, iyo wakiilada bulshada ee goobaha macdan-qodista.

Siyaasaddu waxay dhigaysaa shuruudo mug leh oo loogu talogalay go'aan ka gaadhidda macdanaha iyo biraha, oo ay ku jiraan aqoonsiga baahiyaha saynis sugan, ahmiyadda uu leeyahay suuqa caalamiga ah, iyo faa'iidada wajahaadaha loo marayo ilaalinta deegaanka ee sharcigu dhigayo iyo ka aan sharcigu dhigayn labadaba.

Siyaasaddani waxay dawladda Somaliland saaraysaa masuuliyada sii waditaanka dedaalka loogu jiro in lagu guulaysto maalgashi caalami ah oo ku wajahan macdanta iyo inay ogsoonaato muhiimadda ay leeyihiin arrimaha maaliyadda iyo cashuuraha la xidhiidha ee wax ka qaban kara caqabaddaha gaarka ah ee bah-wadaagta macdanta iyo xaaladdooda heer caalamiga ah.

Siyaasaddani waxay sii kordhinaysaa u heelanaanta Dawladda iyo hirgelinta yoolashada qaranka ee ku jira Hiigsiga Qaranka Somaliland 2030, Qorshaha Hourmarinta Qaranka ee saddexaad (NDPIII), iyo sidoo kale Xeerka Maamulidda Maaliyadda Dawladda (PFM Act), kuwaas oo dhammaantood la filayo inay u wada shaqeeyaan si iskaashi leh, meel isugu soo biyo shubanaya isla markaana is kaabaya.

Dawladdu waa inay ka warqabtaa waajibaadkeeda caalamiga ah, ayna sii wadaa inay latashi la yeelato bah-wadaagta iyo daneeyayaasha kale ee macdanta marka laga xaajoonayo hab-maamulka ku haboon ee waxyaalaha dib loo isticmaalayo. Marka la la galayo wadaxaajoodyadaas, iyada oo aan wiiqayn natiijooyinka ka soo baxaysa, Dawladdu waxay raaci doontaa dareen khatar ka dardaar warinaya oo ku aadan maamulidda sharciyada biraha dib loo isticmaali karo iyo waxyaalaha ay biruhu ku jiraan ee dib loo isticmaali karo.

Iyada oo laga eegayo faa'iidooyinkaas waaweyn ee dalku helayo, iyo iyada oo Dawladdu ka duulaysa masuuliyaddeeda awood sharciyeed, waxay:

- la shaqaynaysaa bah-wadaagta iyo daneeyayaasha kale ee macdanta, si kor loogu qaado wax ku oolnimada iyo waxtarnimada shuruucda, waxayna meesha ka saari doontaa ciladaha aan loo baahnayn ee dib u istimaalidda.
- Dardar gelinaysaa bah-wadaag wax qabad wanaagsan oo dib u isticmaalidda biraha ah, taas oo loo marayo hanaan soo ururin oo ka wanaagsan iyo tiknoolojiyad ka sii casriyaysan oo ah hab-hawleedka kala shaandhaynta iyo dib ula soo bixidda.
- Dhiiri gelinaysaa soo saarista badeecado xiliga la nashaqadaynayo xisaabta lagu daray dib u istimaalidooda; iyo
- qaab isku mid ah uga uga ololaysaa madalaha gudaha iyo dibadaha labadaba in si isku mid loo fahmo qashinka, taas oo hoosta ka xariiqaysa baahida ah in la kala saaro waxyaalaha biruhu ku jiraan ee dib loo isticmaali karo ee u qorshaysan hawlgallo biraha lagala baxayo iyo qashin u qorshaysan in la geeyo meelaha si kama dambays ah loogaga takhalusayo.

## 2.9 Shaqaalaysiinta haweenka iyo caruurta

Macdan Qodista Kooban iyoMacdan Qodista Qadiimiga ah (Artisanal and small-scale mining (ASM)) ayaa ku soo badanaya qaybo badan oo ka mid ah Somaliland, iyada oo tiro badan oo dadka miyiga degan ay xiisaynayaan inay ka qayb qaataan aagan, waxaa isa soo taraya caruurta iyo haweenka xoogsatada ah ee ka qayb qaadanaya hawshan dhaqaale raadinta ee raggu ku badan yahay.

Iyada oo ay dawladdu sii waddo in ay macdanta u tixgaliso in ay ka mid noqoto aagagga soo koraya ee dhaqaalaha waddanka, macdan qodista qadiimiga ah iyo macdan qodista kooban ayaa la filayaa inay sii kordhiso xaddiga wax soo saar ee macdanta. Sidaa daraadeed baahida loo qabo siyaasaddani waxay tahay wax ka qabashada arrimaha guud ee macdanta dalka gaar ahaan marka la eego ka qayb qaadashada haweenka iyo carruurta ee aagan.

Tirada sii kordhaysa ee carruurta iyo haweenka ee ku shaeqeeya kharash jaban, tignoolajiyad hoose, ee ka shaqeeya farsamada macdan qodista ayaa sii kordhaysa. Farqi wayn ayaa loo kala samayn karaa macdan qodista baaxada weyn (badanaa ruqsadaha gaarka ah la siiyo) oo dhinac ah, iyo macdan qodista kooban (oo badanaa sharci la'aan ah) oo dhinaca kale ah. Macdan qodista kooban waxaa sidoo kale ku jira dhammaan qaybaha hoose ee macdanta (mishiinno ha adeegsadaan ama yayna adeegsane) kuwaas oo aan ahayn hawlgallada caadiga ah ee bah-wadaagta macdan qodista.

way adag tahay in la qiyaaso tirada carruurta ah ee ka shaqeysa mcadan qodista, sababtoo ah lama hayo xog cad oo mawduucan ku saabsan, iyo iyada oo aanu jirin qeexitaan oo la isla yaqaanno oo ku saabsan ku shaqaysiga da'yarta. Intaa waxa dheer, erayga Macdan Qodista Kooban iyo Macan Qodista Qadiimiga ( ASM) waa qeexid aan rasmi ahayn oobadanaa aan wali sharci- ahayn, sidaas awgeed way ku adagtahay xirfad-yaqaanadu in ay qiimayn rasmi ah ku samayeeyaan aaggan. Qaar ka mid ah khataraha soo food saara da'yarta waxa ka mid ah:

- Duruufo shaqo, oo marka horaba ay ku gedaamanyihiin duruufo waxyeeli kara bedqabka carruurta.
- Duruufo shaqo oo carruurta u gaysan kara gabood fallo jidheed, maskaxeed ama xad gudubyo kalaba.
- ·Ka shaqee dhulka hoostiisa, biyaha hoostooda, meelaha sare khatarta ah, ama meelo xidhan.

- Ka shaqaynta goobo macdaneed oo noqon kara dhulka hoostiisa, biyaha hoostooda, meel taag sare oo khatar ah, ama meelo kale oo daboolan.
- Ku shaqaynta mashiinada macdanta ee khatarta ah, iyo qalabka kale ee la xidhiidha, ama gacan ku qaadista iyo raridda qalabka macdanta ee aadka u culus.
- Caruurta oo ku shaqeeya deegaan aan caafimaad qabin oo laga yaabo tusaale ahaan in carruurtu kula kulmaan walxaha halista ah ama heerar sare oo sawaxan iyo qaylo ah oo wax yeeli karta maqalka carruurta.
- Duruufo shaqo oo carruurta ku keenaya in ay shaqeeeyaan saacado badan ama habeenkii ama shaqada oo ku qasbaysa in kuu xayirnaado goobta shaqada ee mulkiilaha.

Daraasado badan oo caalamka laga sameeyay ayaa shaaca ka qaaday in bah-wadaagta macdanta iyo wixii la xidhiidhaa ay saameyno kala duwan ku leeyihiin ragga iyo haweenka, Siyaasaddani waxay diiradda saaraysaa in aynu fahanno muhiimada ay leedahay in la yareeyo saamaynaha togan ee macdanta, sido kale in la abuuro mashruucyo wax lagaga qabanayo dhibaatoyinka.

U dhug yeelashada siyaasaddanayaa looga gol leeyahay in la adkeeyo sinnaanta dhinaca shaqada haweenka iyo ragga iyo fahanka goaannada lagu hagaajinayo isudheellitirka ee hawlaha bah-wadaagta macdanta, haweenku waxay u nugul-yihiin saameynaha ka dhasha ka faa'idaysiga macdanta laga bilaabo sahaminta, qodista iyo warshadeynta macdanta ilaa soo afmeeridda mashaariicada macdanta.

Qaar ka mid ah tallaabooyinka la qaadi doono ee siyaasaddan boorinayso waxa ka mid ah:

- Dhiirigelinta  dadka baahiyaha gaarka ah qaba ee ka shaqeeya aagga macdanta, inagoo ku dabaqayna siyaasadda macdanta Somaliland.
- Shaqalaysiin caddaalad u ah ragga iyo haweenka gaar ahaan dhinaca hawl gelinta, dallacsiinta iyo horumarinta xirfadaha.
- Helidda goobo shaqo oo ku haboon haweenka inta lagu guda jiro shaqada.
- Horimarinta siyaasadda kala duwanaanshaha shaqada iyada oo la dhiirigelinayo ka qaybgalka haweenka.
- Jaangoynta xaddiga shaqaalaystiinta ee haweenka, iyada oo aan laga tagayn kartida qofeed ee shaqaalaha.
- Ka qayb-galka tababarada ee ragga iyo haweenka.
- In la qabto tababaro la xidhiidha dhirigelinta shaqalaysiinta macdanta ee haweenka.

Wasaaradda Tamarta Iyo Macdantu waa in ay si dhow ula shaqaysaa Wasaaradda Shaqada, Arrimaha Bulshada Iyo Qoyska si loo xaqiijiyo in sharciga xuquuqda caruurta ee la xidhiidha bah-wadaagta macdanta la ansixiyo oo la hirgaliyo. Iyada oo lala kaashanayo hay'adaha ay khusayso, Wasaaraddu waa in la socotaa oo ay kormeer ku samaysaa heerarka shaqaalaysiinta carruurta ee aaga macdan qodista.

## 2.10 Macdan Qodista Kooban iyo Macdan Qodista Qadiimiga (ASM)

Aaga Macdan Qodista Kooban iyo Macdan Qodista Qadiimiga ah waa aag aad iskugu murugsan, waxa ku jira dad sabool ah, oo raba in ay kala soo baxaan nolol maamlmeedkooga, haddana jecel in macdan qodistooda ka dhigaan mid sharciyaysan oo hannaan sax ah raacaysa. Inta badan shirkadaha labadaa nooc ee macdan qodista ku hawlan waxay ku hawl galaan si ka baxsan sharciga iyo xayndaab-habraaca rasmiga ah. Siyaasaddan Ujeeddadeedu waxay tahay in macdan qodotada dalka ku dhiirri geliso in gacan gaystaan horumar waara, loona aqoonsado in ay saamay togan ku leeyihiin waddanka, dawladda iyo daneeyayaasha kale ee ganacsatadu ku jirto ay kaalmeeyaan dadka ku hawlan macdan qodista.

Tallaabooyinka ay siyaasaddani soo jeedinayso waxa ka mid ah:

- In la sameeyo xayndaab-habraac loogu talagalay horumarinta iyo habaynta shirkadaha macdan qodista qadimiga ah iyo shirkadaha macdan macdan qodista kooban ku hawllan, qeexayana xuquuqda iyo waajibaadka saaran shirkadahaa.
- In shirkadaha ku hawlan macdan qodista loo fidiyo tababrro iyo awood kobcin u gaar ah.
- In la dejiyo istiraatijiyado casri oo mar walba ku salaysan cashirrada laga bartay aaga macdanta.
- In shirkadaha macdatna qoda loo fududeeyo in ay daymo ka heli karaan xarumaha maaliyadda la xidhiidha.
- In la sharciyeeyo oo ruqsado la siiyo dhammaan shirkadaha ku hawlan macdanta qodista kooban iyo macdan qodista qadiimiga ah.
- ·In shirkadaha macdan qodista qadiimiga iyo macdan qodista kooban loo qoondeeyo goobo gaar ah ay ka hawl gali karaan.

- In la dhaqan geliyo lana kormeero xeerarka la xidhiidha shaqaalaysinta carruurta ee shirkadaha macdanta qoda.
- Xoojinta iyo la socoshada daryeelka haweenka ku hawllan macdan qodista.





## 2.10.1 Maalgelinta Shirkadaha ku hawllan Macdan Qodista

Caqabadaha ugu waaweyn ee soo wajaha shirkadaha ku hawllan macdan qodista qadiimiga ah iyo macdan qodista kooban waxa ka mid ah iyagoon helin maalgelin toos. Maadaama marwalba kharashku ku koobanyahay, shirkadahaa yaryar ee dalka ka hawl gala waxa ku adag in maalgashadaan qalabka iyo agabka ay uga baahanyihiin macdan qodista. In maalgelin loo helo macdan qodista dalku waxay fure u tahay in la gaadho horumar waara.

Shirkadahaa yaryar ee macdan qodista ku hawllan waxay hadda ganacsatada amaahdaan qalabka ay u baahanyihiin, taas oo keenta in marka dambe wixii yaraa ee ay la soo baxeen qiime hoose kaga iibiyaan ganacsatadii marka hore wax amaahisay, si ay deynta iskaga bixiyaan. Taasi waxay shirkadaha yaryar ku keentaa in ay mareegtaa furan ku dhex meeraystaan, taas oo caqabad ku keenta in ay faa'iido ka samayn karaan macdan qodista.

Marka la xoojiyo in maalgelin iyo deymo heli karaan shirkadahaa yaryar ee ku hawllan macdan qodistu, waxa hubaal ah in faa'iido wanaagsan ka samayn karaan aaga macdan qodista, taas oo u suuro gelinaysa in ay raacaan habdhaqannada caalamiga ah ee macdan qodista, suuqana ay saamayn wanaagsan ku yeeshaan, isla markaana ay gaadhsiiyaan xasilooni gaadhsiiyaan aaga macdanta iyo macdan qodista.

Inta badan bangiyada iyo xarumaha maaliyaddu waxay waydiiyaan shirkadaha yaryar ee macdan qodista ku hawllan in ay leeyihiin ruqsad macdan qodist iyo agab iyo qalab la rahmi karo. Maadaama haddaba inta badan hadda shirkadaha yaryar ee ka hawlgala dalku aanay rahankaa dhigi karin isla markaana ayna buuxin karin shuruudaha deyn qaadashada ee bangiyada, waxay siyaasaddani xoogga saaraysaa in wax la qabto caqabaddaa, iyada oo raacaysa tallaabooyinkan:

- In shirkadaha yaryar ee ku hawlan macdan qodista kooban iyo macdan qodista qadiimiga ah la siiyo ruqsado ama liisanno u suuro galisa in ay bangiyada iyo deyn bixiyayaasha tusi karaan.
- In la abuuro sanduuq qaran oo deyn bixin u sameeya shirkadaha yaryar ee macdanta ku hawllan.
- In la abuuro mashaariic macdaneed oo dawladda iyo dadwaynuhu wada leeyihiin (PPP).
- In loo raadiyo shirkadaha macdanta kaalmo dhaqaale oo aan deyn ahayn.
- Dardar gelinta deymaha banigayada ganacsi oo bixiya deymaha yaryar ee macdan qodotada la siiyo (micro-finance)

Tallaabooyinkaa sare ku xusan waa in ay salka ku hayaan deyn bixin dulsaarkeedu yaryahay, isla markaana noqoto mid joogto ah dhex wareegta aaga macdanta. Deymahaa dhex wareegaya waa in ay xoogga saaraan jihooyin gaar ah, sida maalgelinta qabalka iyo maaraynta xaaladaha degdegga ee macdan qodista. Dhammaan tallaabooyinkaa sare waxa looga gol leeyahay in ay shirkadaha yaryar ee macan qodistu ku heli lahaayeen taageeryo maaliyadeed.

## 2.10.2 Nidaamyada Wada-shaqaynta iyo Iskaashiga

Dawladdu waxay abuuri doontaa qorshayaal iskaashi, kuwaas oo u dhexeeya Dowladda, lammaanayaasha dawladda kala shaqeeya iskaashiga dhinaca horumarinta macdanta oo ay ka mid yihiin maalgelinta u dhaxaysa labo dal, maalgalinta u dhaxaysa dalal kala duwan, kuwaas oo ay ka mid yihiin Hay'adda Lacagta Aduunka, hay'adaha aan dawliga ahayn, bangiyada, iyo xarumaha maaliyadeed ee kale, kuwaas oo gacan ka gaysta qodista macdanta.

Hindisayaasha gaarka ah waxaa ka mid ah:

a) Dowladda iyo saaxiibadeeda kala duwan ee kala shaqeeya macdan qodistu waa in ay horimariyaan hab maamulka maaliyadeed, si ay u yareeyaan ku tiirsanaanta amaahda ama daymaha.

b) Abuurid nidaamyada sharciyadeed iyo shati bixinta ee macdanta si loo qaabeeyo macdan qodista dalka.

c) Kobcinta wadashaqeynta bangiyada lala leeyahay, si loo abuuro jawi maalgalin oo habboon. Dawladdu waa in ay wada hadal la sameysaa bangiyada si macdan qodotada ay ugu fududeeyaan maalgalinta, taas oo ka caawinaysa in ay ku soo iibsadaan ama ku kiraystaan dhamaan qalabyada kala duwan ee macdan qodista.

d) La shaqeyta macdan qodayaasha si loo horumariyo hab maalgalinta ay ugu heli lahaayeen ururro iyo iskaashatooyin.

Dadaal kasta oo ay dawladdu sameyso waa in lagu xaqiijiyaa amaahda ama dayntu in aysan ahayn "deeq ama hadiyad", sababtoo ah bixinta dhaqaale lagu helayo si bilaash ah waxa ay abuurtaa khalkhal iyo ku tiirsanaan bulsho, xalinta dhibkaasina marka dambe wuxuu mustaqbalka noqonayaa caqabad. Marka aynu eegno hannaanka deyn bixinta wadamada muslimka ah waa mid waafaqsan shareecada islaamka iyada oo tixgalin gaar ah la siinayo mudada iyo awooda dayn bixinta dadka muruqmaalka ee macdan qodotada.

## 2.11 Iskaashiga Bulshada iyo Dawladda

Ka-qaybgalka daaha furan ee bulshadu wuxuu udub dhexaad u yahay hannaanka dejinta siyaasadaha, xeerarka iyo xeer nidaamiyayaasha hoos yimaadda. Tani waa mid aasaas u ah qiyamka dalka, sido kale aasaas u ah dawlad wanaaga, dimuqraadiyada, ka qaybgalka, hufnaanta iyo islaxisaabtanka. Ka-qaybqaadashada bulshadu waa inuu ixtiraamaa madaxbannaanida dhamaan iskaashatada, si kor loogu qaado in shacabku ka qayb qaato awoodaha dowladda iyo ka go'aan gaadhidda waxyaabaha iyaga saamaynaya.

Si loo xaqiijiyo ka-qayb-galka bulshada, Wasaaraddu Tamarta iyo Macdantu waxay dejisay qaabab iyo farsamooyin ay ku xaqiijinayso la bulshada lagula wadago siyaasaddan, si ay u noqoto mid u furan dhamaan bulshada iyo daneeyayaasha kale, iyada oo aan faquuq jirin, iyo sido kale si looga hortago in cid gaar ahi muquuniso qaybaha kale ee ka qayb galaya hirgalinta siyaasadda.

Si taas haddaba loo gaadho, siyaasaddani waa in ka shaqaysaa:

- Dardargelinta hababka ay bulshooyinka maxalliga ahi uga qayb qaadanayaan go'aannada la xidhiidha qorshaynta, hirgalinta iyo sco afmeeridda hawlaha macdanta.
- Kobcinta hab-nololeedyada waara ee bulshooyinka hawlaha macdantu ka socoto.
- Tixgalinta xuquuqda bulshooyinka deegaankooga ayk socoto hawlagallada macdanta.
- In meesha laga saaro takoorka hab xulashada shaqaalaha, ee ku salaysan jinsiga, qabiilka ama naafanimada.

Dardargelinta daryeelka xuquuqda carruurta iyo bina aadanka kale ee ka shaqeeya aaga macdan qodista dalka.

## 2.12 Wax-ku-darsiga dalka

Wax-ku-darsiga awoodda dalka ee shirkada macdantu waxay qiime u tahay mashruuca, wax ku darsigaa oo wax taraya bulshada deegaanka, gobolka, ama guud ahaan dhaqaalaha qaranka, oo ayna ku jirin dakhliga kale ee laga helo khayraadka dalka. Siyaasaddan ujeedadeedu waxay tahay in la dhiirigeliyo waxyaabaha dalka gudihiis laga helayo, ah iyada oo loo marayo shuruudaha iyo hagayaasha ku qoran shuruucda dalka iyo shuruudaha qandaraasyada gaarka loo galayo. Wax-ku-darsiga dalka waxaa loogu talagalay in kobciyo dhaqaalaha dalka iyo horumarka bulshadaba, si loo dhimo saboolnimada, loona gaadho bahaadhe lagu gaadhi karo karo horumar waara.

Siyaasadda Macdanta iyo Xeerarkuba waxay si cad u qeexayan waxa uu yahay wax ku darsiga dalku. Tallaabooyinkankaa dhammaanw axa looga dan leeyahay in lagu kobciyo maalgashiga macdan qodista Somalialnd, oo la filayo in uu ku yimaaddo saamayn wayn dalka, iyada oo la kala soocayo shaqooyinka iyo dhaqaale abuurka.

Dawladda Somaliland oo adeegsanaysa Wasaaradda Tamarta iyo Macdantu waxay ku dedaalaysaa inay fududayso aasaaska iyo xoojinta goobaha isku xidhaya dawladda, shirkadaha, aqoonyahanka iyo diranayaasha u dooda bulshada rayidka ah, si loo wadaago loona abuuro aqoon ku saabsan horumarinta aaga macdanta ee dalka. Goobtaa la iskugu imanayaa waxay noqon kartaa madal kaliya oo ay ka dhacaan doodaha hadba jira, oo ah madal la is-weydaarsado xogta, iyo cilmi-baadhista la xidhiidha ka qaybka dalka ee arrimaha macdanta. Nuxurka siyaasaddani waa in la dhiso gole firfircoon oo la isu weydaarsado aqoonta isla markaana looga faa'iidaysto in lagu hirgaliyo ka qaybgalka dalka ee arrimaha macdanta.

### 2.12.1. Hannaanka Maaliyadeed ee Dalka

Hannaanka maaliyadeed ee macdanta Somaliland waxay hoos yimaadaan am ka farcamaan Xeerka Macdanta Somaliland, Xeerka Dakhliga Somaliland, Xeerka Kastamyada Somaliland iyo Xeerka Maaraynta Maaliyadda Guud ee dalka (PFM).

Xeerka Macdantu wuxuu dhigayaa qiimaynta guud ee khidmadaha ku waajibay laysamada, ruqsadaha iyo hawlaha kale ee la xidhiidha sahaminta iyo macdanta qodista. Intaas waxaa dheer, Xeerka Macdantu wuxuu dhigayaa qodobbo ka hadlaya ujoorooyinka macdanta ay dawladdu qaadayso, kuwaa oo loo raacayo xeer nidaamiye uu ansixiyey wasiirka macdanta ee xilligaa shaqeynaya. Sida ay macdanuhu u kala duwan yihiin ayey ujuurada ku waajibtayna u kala duwanaanayaan.

Dawladda Somaliland waxay qarwaaqsantahay xaqiiqada odhanaysa in hannaanka maaliyadeed (cashuuraha, ajuurooyinka, khidamaha iyo kharashaadka kale) ee lagu maamulo macdanta dalku ay tahay qodobka ugu muhiimsan ee lagu go'aamiyo maalgashiga shirkadaha macdanta ee mashaariicda sahaminta iyo macdan qodista dalka ka bilaabaya. Haddaba, Dawladdu waxay hiigsanaysaa isu-dheellitirka danaha dalka iyo tan shirkadaha macdanta qodaya ama sahaminaya. Hannaanka maaliyadeed ee Somaliland waxa uu higsanayaa in uu hubiyo wax ku soo celinta dawladda, iyo in uu hagayaal cad u dajiyo bah-wadaagta macdanta dalka.

Dawladdu waxay dejinaysaa habraacyo lagu maamulayo dakhliga ka soo xarooda macdanta, iyada oo kala cadeynaysa xaddiga ay dawladdu ku leedahay mashruuca macdan qodist iyo shirakdaha. Hannaankaa maaliyadeed waxa ka mid ah cashuuraha, ajuurooyinka, khidmadaha iyo wadaagidda wax soo saarka macdanta. Hadba nooca hannaanka maaliyadeed ee dawladdu dooranayso waxay ku xidhantahay hadba inta dawladdu ka rabto dakhliga, sida loo wadaagayo khatarta macdanta qodista, sida loola jaanqaadayo isbadallada ku dhaca faa'iidada, iyo sidii loo jiidan lahaa maalgashiyo cusub oo aaga macdanta dalka soo gala.

Somaliland waa dal curdin u ah ka faa'idaysiga macdanta oo leh jiyoolajiyad ku soo jiidanaysa. Taasi waxay ku tusinaysaa korodhka daneeyayaasha dalka gudihiisa iyo daneeyayaasha ajaanibta ah ee soo dalbanaya liisamada kala duwan. Arintan waxaa xoojinaya ama dhiiri-galin u sameynaya hufnaanta, degenaanta hab maaliyadeedka loo qorsheeyey in lagu soo jiito maalgashi macdaneed isla markaana lagu kobciyo dakhliga dalka.

Siyaasaddani waxa dhiiri-galinaysaa;

- In dalku si siman u wadaago dhaqaalaha iyo hormarka laga faa'iday macdanta, taas oo ay si wacan uga wada faa'idayaan shacabka iyo maalgashadaha.
- In la kobciyo dhaqaalaha muwaadiniinta soomaalilaand, iyada oo loo abuurayno fursado ganacsi iyo hal abuurro ganacsi oo la xidhiidha macdanta.
- In dawladda iyo shacabku wadaagaan ujoorooyinka iyo dheefta laga helo macdanta
- In la xoojiyo dakhliga ka soo xarooda ujoorooyinka, khidmadaha iyo kharashaadkakale ee waajibay.

## 2.12.2 Qodobbada Maaliyadeed

Hannaanka maaliyadeed ee macdanta Somaliland waxa qeexa Xeerka Macdanta Somaliland, Xeerka Dakhliga Somaliland, Xeerka Kastamyada Somaliland iyo Xeerka Maaraynta Maaliyadda Guud ee dalka (PFM).

## 2.12.3. Khidmadaha

Xeerka Macdanta Somaliland iyo Xeer nidaamiyayaasha hoos yimaaddaa waxa ay sheegayaan habka loo jaangoyo cashuruaha, khidmaha iyo ajuurooyinka iyo kharashaadka kale ee la xidhiidha sahaminta iyo macdan qodista.

## 2.12.4 Ujoorooyinka

Xeerka Macdanta Somaliland iyo Xeer nidaamiyayaasha hoos yimaadaa waxa ay waajibinayaan ujoorooyin ay qaadayso dawladda heerarkeeda kala duwan, ee kala ah Dawladda dhexe, Gobolka iyo Degmada. Sidoo kale xeerku wuxu mudnaan siinayaan dadka ay si gaar ah u saameynayso macdan qodistu. Sidaa daradeed Wasaaradda Tamarta iyo Macdantu waxa ay jaangoyn u sameynaysaa xaddiga ujuurada macdaneed ee ku waajibay macdanaha kala duwan iyada oo tixgalin la siinayo goobaha lacag bixinta macdanta sida dekadda ama goobta macdant laga qodayo.

Xaddiga ujoorooyinka waxa shaacinaysa Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, waxana lagu shaacinayaa tacriifadda macdanta oo lagu faafinayo faahinta rasmiga ah ee dawladda.  Sidoo kale tacriifadda waxa lagu baahinayaa mareegta Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta (Website)

## 2.12.5 Tixgalinta Gaarka ee Qaab Bixinta Ajuurooyinka

Xeerka Macdanta Somaliland iyo Xeer-nidaamiyaasha hoos yimaadda waxay dhigayaan qodobbo la xidhiidha ajuurooyinka macdanta laga helo, sida qiime dhimista ujuurada, hakinta iyo dib u dhigista xilligii la bixin lahaa ujuurada haddii xaalado gaar ahi soo kordhaan. Qodobbadan oo dhammaantood qayb ka ah waxyaabaha dawladdu ku dhiirri galineyso maalgashiga macdanta.

Sidoo kale, Xeerka Macdanta Somaliland iyo Xeer-nidaamiyayaasha waxay habaynayaan Heshiisyada Macdaneed ee dhex mara dawladda iyo shirkadaha macdanta ka shaqeeya, sida Heshiiska faa'iido Wadaagidda. Heshiisyadaasi waxay u yaallaan qaab xasiloonida suuqa dammaanad qaadaya iyo qodobbo kale oo dhiirri galinaya maalgashadayaasha.

## 2.12.6 Abuuridda Deegaan dhiiri-galinaya hannaanka maaliyadeed ee dalka, cashuuraha iyo isu socodka lacagaha

Lacagta rasmiga ah ee Somaliland ee sharciga ahi waa Shilinka Somaliland oo sarifka lagu sarifayo Doolarka Mareykanka iyo lacaga kale ee qalaad uu yahay mid la jaan go'an oo la isla garan karo. Doolarka markaykanka ayaa dalka si aad looga adeegsadaa, waana lacagta aan rasmiga ahayn ee suuqa. Somaliland waxay u fidisay dhiirrigelin wanaagsan dhammaan maalgashadayaasha, taas oo u oggolaanaysa dib u celinta lacagta qalaad oo aan xadidneyn. Heerka sicir bararku aad ayuu u yaryahay, mana dhaafo 4%.

## 2.12.7 Cashuuraha Dhiirigaliya Maalgashiga

Canshuurta shirkadaha waaaweyn ayaa hadda ah qiime siman oo ah 10%, halka cashuurta mushaharku ay tahay qiime siman oo ah 6%. Dhanka kale cashuurta iibka ayaa ah 5%. Waxyaabaha kale ee canshuuraha lagu dhiirrigeliyo waxaa ka mid ah cashuur dhaafka saddexda sanno ee hore ah ee shirkadaha iyo cashuur dhaafka ka soo dhoofinta mashiinada iyo qalabka kale ee macdanta.

In shirkadaha yaryar ee ku hawlan macdan qodista kooban iyo macdan qodista qadiimiga ah la siiyo ruqsado ama liisanno u suuro galisa in ay bangiyada iyo deyn bixiyayaasha tusi karaan.

- In la abuuro sanduuq qaran oo deyn bixin u sameeya shirkadaha yaryar ee macdanta ku hawllan.





# Cutubka

# 03

## Ujeedooyinka Qaab-Dhismeedka iyo Mabaadi'da Hagaya Siyaasadda

## 3.1 Istiraatiijiyadaha Siyaasadda

### 3.1.1 Hagaajinta hab maamulka macdanta iyo macdan-qodista

**Istiraatiijiyadda 1aad**

Dejinta xayndaab-habraac xeer iyo xeer-nidaamiye oo fudud, xasilloon, la saadaalin karo, oo daahfurandaahfuran oo lagu hagi karo aaga macdanta iyo macdan-qodista.

Khayraadka Macdanta dalka waxaa iska leh Shacabka Somaliland guud ahaan, oo ay wakiil lagu aaminay u tahay Dawladdu, iyada oo raacaysa Dastuurka Somaliland iyo Xeerka Macdanta Somaliland. Sida ku cad qaabdhismeedkan sharci ee xagga hore ku xusan, Golaha Wakiilada ee Baarlamaanka Somaliland waxa uu samayn karaa sharciyo gaar ah oo lagu maamulayo xuquuqda iyo danaha shirkaddahashirkaddaha macdan-qodista.
Wasaaradda u xilsaaran macdanta iyo macdan-qodistu waxay sii haynaysaa mas'uuliyadda guud ee maamulka iyo siyaasad-dejinta khayraadka macdanta Somaliland, oo ay ku jirto ruqsad bixinta macdantu. Wasiirka ayaa mas'uul idman u ah maamulka maalinlaha ee awoodda u leh gudashada waajibaadka ka saaran arrimaha la xidhiidha siyaasadda macdanta iyo bixinta ruqsadaha macdanta.
Wasiirku isaga oo ka shaqaynaya dhaqangelinta siyaasaddan, waa inuu hubiyaa wada shaqaynta toolmoon ee ka dhaxaysa wasaaradaha iyo hay'adaha u xilsaaran deegaanka, ganacsiga, maaliyadda, shaqada iyo  Xeer Ilaaliyaha Guud iyo kuwo kale ee fududaynaya dhaqan galinta siyaasaddan.

### 3.1.2 Maaraynta heshiisyada iyo Qoondaynta Xuquuqda Macdanta

**Istiraatiijiyadda 2aad**

Samaynta nidaam ruqsad-bixineed oo daahfuran, kaas oo suuro galinaya habsami u maaraynta heshiisyada iyo qoondaynta xuquuqda macdanta.

Qaabka ugu muhiimsan ee loo maareeyo kheyraadka macdanta qaranka waa la dhiso nidaam qoondaynaya xuquuqaha shirkaddaha iyo dadka macdan-qodista ku hawlan ee fulinaya hawlgallada sahaminta macdanta iyo macdan-qodista, isla markaana si cad u qeexaya waajibaadka iyagana saaran.

Ujeedada hannaanka ruqsad bixinta macdantu waa in loo qoondeeyo xuquuqda macdaneed (meelaha aan la mamnuucin ama la xayirin) kuwa ugu fiican ee soo badhiga in ay aqoon durugsan u leeyihiin guud ahaan qaninimada macdanta, isla markaana sunti kara meelaha ay ku samaysmeen macdanaha qiime ganacsi leh, sidoo kalana u samayn kara macdan-qodis iyo dhoofin ganacsi gal ah qaab ay ku dheehan wax ku oolnimo iyo xilkasnimo.

Ujeedadan waxa sida ugu wanaagsan lagu gaadhi karaa iyada oo la sameeyo nidaam ruqsad-bixineed midaysan, oo leh xanynaab sharci, xeer nidaamiye, iyo hagayaal maamul. Midaynta ruqsad bixintu waxa ay sahlaysa in hawgallada macdan-qodista loo guto si siman oo ku salaysan go'aanno cuskanaya qodobbo maalgashi oo la saadaalin karo oo la qorshayn karo. Waxa kale oo ay kor u qaadaysaa awoodda hay'adaha maamula macdanta in ay hannaankan wax ugu maamulaan si daahfuran oo wax ku ool ah. Taas oo saldhig u noqonaysa qancinta isla xisaabtan ee Shacabka iyo Baarlamaanka.

### 3.1.3 Xogta iyo Macluumaadka Jiyoolajiyeed

**Istiraatiijiyadda 3aad**

Kobcinta ururinta, kaydinta, iyo faafinta xogta jiyoolajiyeed.

Danaynta sii korodhay ee aaga macdanta awgeed, waxa loo baahan yahay in la helo xog iyo macluumaad jiyoolaji sax ah oo casri ah. Qayb ballaadhan oo dalka ka mid ah wali laguma samayn sahan macdaneed si loo ogaado kaydka macdanta ee ku jira, taas oo muujinaysa baahida loo qabo in la xoojiyo sahannada macdanta. Xogta la ururiyaa waxa ay u sahlaysaa Dawladda in ay garan karto goobaha saxda ah ee ku habboon macdan-qodis la hubo. Xogta ku saabsan macdanta dalka waxaa lagu kaydin doonaa Kaydka Xogta Macdanta (geo-data Bank) waxaana geli Kara daneeyayaasha kala duwan ee macdanta iyada oo hadba ay ku xidhan tahay baahida uu u qabo xogtaa iyo xuquuqda uu daneeyahaasi u leeyahay helidda xogtaa.

Bixinta xog cilmiyeed jiyoolaji waxay ku lug leedahay tacab iyo u heelanaan badan, sidaa daraadeed waa in dhaqaale laga soo saaraa si kab loogu helo joogtaynteeda.

Tani waxay sidoo kale xaqiijin doontaa in aaga macdantu soo jiido xirfadlayaal iyo shirkaddo aqoon wanaagsan u leh macdanta. Waa in si joogto ah loo sii wadaa mashaariicda lagu ogaanayo baaxadda macdaneed ee dalka iyada oo loo marayo sahaminta xagga cirka ee dhammaan gobollada dalka oo dhan.

Si ay fursado tababar oo wax ku ool ah u helaan muwaadiniinta Somaliland ee aqoonta u leh cilmiga jiyoolajiga iyo ardayda kale ee macdanta barata waxa shirkaddahashirkaddaha macdan-qodista laga filayaa in ay shaqo-carbin iyo tababaro siiyaan ardayda dalka ee wax ka barata machadyada tacliinta sare. Samaynta tilmaamaha iyo shuruudaha ku habboon tababarradaa iyo shaqo-carbintaa waa in lala kaashadaa hayádaha ay khusayso.

## 3.1.4 Helitaanka Dhul Macdaneedka

### Istiraatiijiyadda 4aad

Samaynta nidaamyo xeer-dejineed iyo hab-maamul fududaynaya helitaanka dhul laga hirgaliyo macdan-qodista.

Dawladda Somaliland waxay garwaaqsan tahay in qodobka ugu muhiimsan ee gacan ka gaysan kara macdan sahamin iyo macdan-qodis waartaa uu yahay in la kobciyo helitaanka dhulka, taas oo horseedi doonta sahamin sii socota iyo helitaanka daahfuryo cusub. Helitaanka dhul sahamin laga sameeyaa waxay sidoo kale horseedi doontaa fahanka aqooneed la xidhiidha tiknoolajiyadaha cusub ee ee lagu dabaqi karo degaannada kala duwan iyo dhaqan, dhaqaale, deegaan iyo cimilo ee gedaaman dhulkaa. Daahfurka dhaqaale ee goob macdaneed cusub wuxuu yimaaddaa ka dib sannado badan oo maalgashi la taaban karo la galiyay sahaminta macdanta iyo hawlgallada macdan-qodista. Tani waa sababta hawlgallada sahaminta iy qodista macdantu aanay marna uga maarsanayn in la helo jawi sharci oo koobsanaya siyaasad, xeerar, xeer-nidaamiyayaal la saadaalin karo, dhammaantood dammaanad qaadaya hababka helitaanka dhulka iyo amniga muddada shaqadu socoto, si loogu dhiirran karo maalgashiga macdanta ee khatarta sare ee maalgashi ku gedaamantahay. Helitaanka dhulka iyo u adeegsigiisa danaha kala duwan waa u muhiim jiritaanka Somaliland ee mustaqbalka fog iyo tartanka caalamiga ah ee ay ku jirto.

Guud ahaan dhulka Jamhuuriyadda Somaliland waxaa leh Dawladda Somaliland (sida ku cad qodobka
12aad, faqradiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland). Dhulka Jamhuuriyadda Somaliland waxa lagu maamulaa Xeerka Maamulka Dhulka.

### 3.1.5 Dhulka Magaalooyinka

Xeerka ugu muhiimsan ee lagu maamulo magaalooyinka iyo dhulka kale ee magaalo waa Xeerka Maamulka Dhulka Magaalooyinka EE (Xeer Lr. 17/2001), kaas oo wax ka beddel iyo kaabis lagu sameeyay 2008dii. Arrinta lahaanshaha dhulka gaar ahaan magaalooyinka iyo xarumaha kale ee magaalooyinka ku yaalla waxaa la isla garwaaqsaday inay tahay mid aad loogu muransan yahay oo inta badan ka mid ah waxyaabaha keena isqabsiga bulshada. Dawladaha Hoose ayaa awood u leh inay bixiyaan lahaanshaha dhulka magaalooyinka.

### 3.1.6. Dhulka Beeraha

Dhulka beeralayda waxaa lagu maamulaa Xeerka Lahaanshaha Dhul-Beereedka (Xeer Lr. 08/99)

### 3.1.7. Dhulka Miyiga / Daaqsinka ah

Dhulka beeralayda waxaa lagu maamulaa Xeerka Lahaanshaha Dhul-Beereedka (Xeer Lr. 08/99)

### 3.1.8. Dhulka Macdan-Qodista

Dhulku waa kheyraad muhiim u ah horumarinta waddanka, gaar ahaan aaga macdanta iyo macdan-qodista. Siyaasad dhul oo tifaftiran iyo hab maamulka dhulku waxay lagama maarmaan u yihiin sugidda xuquuqda hawlah macdanta, oo la'aanteed aanay suuroobayn maalgashi macno leh oo macdanta la galiyaa. Dhulku guud ahaan waa arin qiiro leh,
wuxuuna sababaa isku dhacyo xagga khayraadkaah. Xeerka Macdantu waxa uu ilaaliyaa bah-wadaagta macdanta isaga oo bixinaya xuquuqda heshiisyada macdanta.

Xeerka macdanta ayaa u dammaanad qaadaya macdanlayda xuquuqda lahaanshiyaha kala duwan ee macdanta. Somaliland waxay samaysatay guddida dhulka oo ka kooban siddeed wasaaradood oo muhiim ah oo kala matalaya qaybaha kala duwan ee horumarka dalka. Sida uu dhigayo Dastuurka Somaliland, dhulka oo dhan waxa leh Waddanka. Guud ahaan dhulka waxa loo kala saari karaa sidan soo socota:

a. Dhulka Danta Guud
b. Dhulka Gaarka loo leeyahay
c. Dhulka Bulshadu wada leedahay (Dhul-daaqsimeedka miyiga)

Dhulka iyo isticmaalka dhulka waxa loo qaybiyaa:
1. Dhul Magaalo
2. Dhul-beereed
3. Miyiga/daaqsinka

## 3.1.9. Xuquuqda lahaanshiyaha oogada dhulka iyo Macdanta

Xeerka Macdanta Somaliland waxa uu dhigayaa in dhammaan macdanta ay wada leeyihiin Shacabka Somaliland, laguna aaminay Dawladda. Sidaa daraadeed, mulkiilayaasha dhulka ee hoos yimaada qaybaha kala duwan ee lahaanshaha dhulka Jamhuuriyadda Somaliland ee xagga sare ku xusan waxay xaq u leeyihiin oogada sare ee dhulka oo keliya, taas oo aan siinayn ku andacoodka lahaanshiyaha xuquuqda macdaneed ee dalka. Si loo helo xuquuq oogada sare ee dhulka ama xuquuqda macdanta, waa in la raacaa hannaanka iyo habraacyada codsiga iyo mulkiyidda lagama maarmaanka ah ee ay fuliyaan gacantana ku hayaan hayádaha maamul ee kala duwan.

Si kor loogu qaado hawlaha sahaminta iyo macdan-qodista dalka, iyo si loo furfuro suuqa macdanta dalka oo faa'iido u leh Shacbiga Somaliland, waa in ay Dawladdu ku dadaasho in ay helidda dhulka u fududayso dadka soo codsada xuquuqaha macdanta. Helitaanka dhulka sahaminta iyo macdan-qodistu wuxuu keeni karaa magdhow, raritaan iyo dib u dejin loo sameeyo milkiilayaasha iyo deganayaasha dhulka ee ay saamaysay hawsha sahaminta ama macdanta-qodistu. Sidaa daraadeed, waa in Dawladdu xaqiijisaa magdhow degdeg ah, oo cadaalad ah oo ku filan dadka ay saamaysay hawshaa macdan sahamintu ama qodistu. Haddii laga maarmi waayo rararitaan iyo dib udejin, waa in arrintaasi loo fuliyaa iyada oo la tixgalinayo xuquuqda aadanaha ee aasaasiga ah, sida uu dhigayo Dastuurka dalku, halbeegyada caalamiga ah iyo hab-dhaqannada ugu wanaagsn ee dunida ee arrinkan la xidhiidha. Arrimahani waxay u baahan yihiin wadashaqayn dhinacyo badan leh, waana in ay si wadajir ah isaga kaashadaan hay'adaha iyo dadka ay khusayso.



## 3.1.10 Xeerarka Deegaanka ee La Xidhiidha Sahaminta iyo Qodista Macdanta

**Istiraatiijiyadda 5aad**

In hiigsado aaga macdan-qodista dalka oo si habboon oo joogtaysan loo maamulo, taas oo dhiirigalinaya in macdanta looga faaíidaysto iyada oo deegaanka la ilaalinayo, lana muujinayo xilkasnimo bulsho iyo dhawridda bulshooyinka ku xeeran goobaha macdanta.

Istiraatiijiyaddan ujeeddadeedu waxaytahay in sahaminta macdanta iyo qodistuba salka ku hayaan daryeelka deegaanka iyo bulshada,  kuwaas oo raacaya siyaasadaha iyo habraacyada adeegsiga dhulka, iyo in mar kasta la xaqiijiyo samaynta iyo dhaqangalinta siyaasado, xeerar, xeer-nidaamiyayaal cad cad oo isku xidhan oo ku saabsan adeegsiga dhulka, oo ay ku jiraan shuruudaha go'aaminaya adeegsiga dhul gaar ah iyada oo la tixgalinayo  laguna xisaabtamayo dhibaatooyinka bulsho iyo deegaan ee ka dhalan kara macdanta.

Istiraatiijiyaddani waxay wax ka qaban doontaa caqabadaha tooska ah ee deegaanka iyo bulshada ka soo wajaha macdanta, sida barakicinta bulshada iyo khalkhalgelinta hab-nololeedkooda, wasakhowga biyaha dusha iyo biyaha dhulka hoostiisa ah, isku dhacyada bulshada, arrimaha ka dhasha soo gababaynta goob macdaneed, caafimaadka bulshada iyo shaqaalaha, badbaado-qabka guud iyo daryeelka dumarka.

Waa in xeer dejin tafatiran iyo xeer-nidaamiyayaal ku habboon loo sameeyaa wax ka qabashada caqabadaha waaweyn ee ka taagan aaga macdanta oo ay ka mid yihiin hirgelinta xayndaab-habraacyada sharci ee deegaanka,hannaanka loo baadhayo saamaynta iyo raadreebka macdanta, iyo xidhiidhka ka dhexeeya shirkaddahashirkaddaha macdan-qodista, Dawladda iyo bulshada.

Ujeedadda Dawladdu waa sidii loo gaadhi lahaa isku dheelitir bulsho oo maangal ah oo ah qayb muhiim ah oo ka mid ah xayndaab-habraaca sharciyeed deegaanka, kuwaas oo isku dheellitiraya shirkaddaha macdan-qodista, deegaanka, dadka iyo agabka, si loo xaqiijiyo in dhammaan daneeyayaasha aaga macdanta iyo macdan-qodistu u hoggaansamayaan heerarka caalamiga ah ee daryeelka deegaanka.

## 3.1.11 Caafmaadka iyo Badbaado-qabka

### Istiraatiijiyadda 6aad

Dawladda Somaliland waxay tixgalinaysaa oo ay garwaaqsantahay in guud ahaan ay jiraan khataro la xidhiidha bah-wadaaggo badan oo ay ka mid tahay ta macdan-qodistu. Bah-wadaagta macdan-qodista ayaa had iyo jeer lagu daraa kuwa ay ku gedaaman yihiin khataro badan. Macdan-qodista dhulka hoostiisa ah waa deegaan khatar ah oo aan xasilloonayn.Sidaa darteed istaraatiijiyaddani waa inay hubisaa abuurista goobo shaqo oo bedqaba, oo yareeya caqabadahan xagga sare ku xusan, si macdan-qodistu ugu dhacdo jawi shaqo oo bedqaba.

Waxa jira laba siyaalood oo waaweyn oo lagu hubiyo laguna sugo halbeegyada badbaadada shaqada iyo caafimaadka ee hawlgallada macdan-qodista Somaliland. Kuwaas oo kala ah Xeerka Macdanta Somaliland iyo Xeer-nidaamiyaha la xidhiidha Caafimaadka iyo Badbaado-qabka Deegaanka. Xeer-nidaamiyayaal kale oo dhowr ah ayaa dhameystiraya hubinta caafimaadka iyo badbaado-qabka macdan-qodista. Xeer-nidaamiyayaashaa waxaa ka mid ah kuwa la xidhiidha adeegsiga walxaha qarxa iyo sidoo kale kuwa la xidhiidha walxaha macdanta ee shucaaca leh.

Xeerka Macdanta iyo xeer-nidaamiyayaashaka farcamaa waxa ay bixiyaan xayndaab-habraac faahfaahsan oo xusaya mas'uuliyadaha iyo waajibaadka lakala leeyahay, si goobaha hawlgallada macdantu u noqdaan goobo shaqo oo bedqaba oo caafimaad qaba, iyo in khataraha laga ilaaliyo dadka shaqada ku jira bulshooyinka deriska la ah goobaha macdanta.

Xeerarkan iyo xeer-nidaamiyayaashani waxay qeexayaan heerarka caafimaadka iyo badbaado ee shaqada iyo hawlgallada macdanta, ee ay ka midka yihiiin tallaabooyinka la qaadayo inta lagu gudo jiro maaraynta, adeegsiga, raridda iyo kaydinta walxaha khatarta. Waxay sidoo kale qeexayaan waajibaadka saaran cidkasta oo ku jira hawlgallada macdan-qodista oo ay ka mid yihiin mulkiilayaasha, shaqaalaha, qandaraaslayaasha, dadka ku lugta leh naqshadeynta, keenidda iyo rakibaadda warshadda macdanta, iyo sidoo kale raridda, adeegsiga iyo kaydinta walxaha qarxa iyo walxaha kale ee khatarta ah.

Xeerka Macdanta Somaliland iyo Xeer-nidaamiyayaashiisa ayaa qeexaya oo caddaynaya ciqaabaha iyo ganaaxyada ka dhalan kara ku xad-gudubka waajibaadkaas sare, taas oo looga dan leeyahay in lagaga hortago xaaladahan khatarta ah.

Howlgallada kala duwan ee macdan-qodista la xidhiidha ee Somaliland ka socdaa waxa ay keeni karaan khataro caafimaad iyo bedqab oo kala duwan. Siyaasadda macdanta iyo macdan-qodistu waxay ujeeddadeedu tahay in ay hirgeliso tallaabooyinka lagu dhimayo dhimashada, dhaawacyada iyo cudurrada la xidhiidha macdanta. Waxaa la aamminsayahay in macdan-qodista dhulka dushiisa ama hoostiisu labaduba keen karaan dhimasho, dhaawacyo iyo cudurro ka dhasha goobta shaqada. Soo ifbixii isticmaalka Cyanide iyo Meerkuri ee loo adeegsaday sifaynta dahabka ayaa muujinaysa arrimo khatar ah oo cusub oo ka dhex jira bah-wadaagta macdanta. Hawlgallada macdan-qodista dhulka oogadiisa bulshada ku soo dhaweeyeen macdanta la qodayo, taas oo ay ka dhalan karaan khataro caafimaad iyo bedqab oo hor leh.

In kasta oo uu sharcigu dhigayo nidaamiyo hawlgallada la xidhiidha macdan-qodista qadiimiga ah iyo macdan-qodista kooban (artisanal and small-scale mining operationgacanta), haddana wali inta badan ee macdan-qodista dalka ee labdaa la xidhiidha sifiican looma maamulin. Guud ahaan waxa jira heerar macdan-qodista la xidhiidha oo aan la aqbali karin oo dhimasho iyo dhaawacyo halis ah keena, oo ka dhaca goobaha shaqada ee macdan-qodista qadiimiga ah iyo macdan-qodista kooban (artisanal and small-scale mining). Sidaa daraadeed siyaasaddani waxay diiradda saaraysaa in horumar wanaagsan lagu sameeyo shuruucda aaga macdanta.

Ujeeddada siyaasaddani waa in la hubiyo in dhammaan hawlaha macdan-qodista ee dalka loo guto qaab lagu ilaalinayo fayodhawrka deegaanka, iyo badbaado-qabka shaqaalaha iyo guud ahaan bulshada. Taas oo lagu gaadhi karo iyada oo loo hoggaansamaya xeerarka iyo xeer-nidaamiyayaasha deegaanka, caafimaadka iyo badbaado-qabka iyo in la dhiso hannaan iyo nidaamyo lagu kormeerayo oo lagula soconayo.

## 3.1.12 Hannaanka Maaliyadda

### Istiraatiijiyadda 7aad

Samaynta iyo hirgelinta nidaam maaliyadeed oo xasilloon, daahfuran, la saadaalin karo oo dunidana la tartarmi Kara.

Khayraadka macdanta ee dalka waxa iska leh Shacbiga Somaliland, waxayna ku aammineen Dawladuna. Ajuurada laga qaadaa waxay magdhow u tahay macdanta la soo saaro. Maaha cashuur, balse waa xaq ay leeyihiin muwaadiniinta Somaliland oo u magdhabaysa kheyraadkooda macdaneed ee aan dib u cusboonaanyn.

Hannaanka ajuurada ee Somaliland waxa uu siinayaa bah-wadaagta qaab ajuuro bixineed oo toos ah, daahfuran, deggan oo la saadaalin karo. Marka ajuurada la xisaabinayo, waa in macdanta dalka loo qiimeeyaa si cadaalad ah, oo ku haboon khayraadka macdanta, iyada oo aan loo eegayn meesha iyo sida badeecada loo iib gaynayo.

Istaraatiijiyadan waxa ujeedadeedu tahay in hubiyo in Dawladdu hesho dakhliga ajuurada. Iyada oo la eegayo wixii laga maarmi waayo iyo hadba xaaladaha taagan, wax la samayn karaa wax ka beddel iyo kaabis, sida qiime dhimista, xayiraadda, iyo dib u dhigista bixinta ajuurada, sida uu dhigayo xeer-nidaamiyaha ajuurooyinku. Istaraatiijiyaddani sidoo kale waxa ujeedadeedu tahay in wax laga qabto laba caqabadood oo waawayn ah oo ay ka mid yihiin:

Istaraatiijiyadan waxa ujeedadeedu tahay in hubiyo in Dawladdu hesho dakhliga ajuurada. Iyada oo la eegayo wixii laga maarmi waayo iyo hadba xaaladaha taagan, wax la samayn karaa wax ka beddel iyo kaabis, sida qiime dhimista, xayiraadda, iyo dib u dhigista bixinta ajuurada, sida uu dhigayo xeer-nidaamiyaha ajuurooyinku. Istaraatiijiyaddani sidoo kale waxa ujeedadeedu tahay in wax laga qabto laba caqabadood oo waawayn ah oo ay ka mid yihiin:

a. Sida loo qaabeeyo habka ugu wanaagsan uguna dheelitiran ee muujinaya qaabka wadaaggadakhliga ee u dhexeeya dalka martida loo yahay iyo maalgashadayaasha.
b. Sida loo maareeyo dakhliga dalka soo gala si faa'iidadu bulshada u wada gaadho.

Tilmaamaha ugu muhiimsan ee hannaanka maaliyadeed ee macdantu waa sidan soo socota:

- Nidaam maaliyadeed oo habaysan oo daahfuran kaas oo tixgalinaya isbeddellada caalamiga ah oo awood u siinaya maalgashadayaasha inay saadaaliyaan oo ay qorsheeyaan waajibaadka maaliyadeed. Habayntan oo kale waxa ay sidoo kale wanaajisaa awooda masuuliyiinta macdanta si ay si wax ku ool ah oo saamayn leh ugu maamulaan hannaanka.
- Ujuurada macdanta, hababka lagu go'aamiyo xaddiga ujuurada iyo hababka lacag bixinta ee ay dejiso Dawladdu marka muddo la joogaba, iyada oo la raacayo xeerarkaiyo xeer-nidaamiyayaashakhuseeya.
- Cashuurta dakhliga ee shirkaddaha, hababka loo go'aamiyo xaddiga iyo qaabka lacag bixinta ee ku xusan xeerarka canshuurtan khuseeya.
- Cashuuraha maaliyadeed ee kale, hababka loo go'aamiyo xaddiga iyo qaabka lacag bixinta ee ku xusan xeerarka khuseeya.

- Qodob xusaya in Dawladdu heshiisyo la gasho cidda haysata xuquuqda heshiisyad macdaneen, si ay goáan muddo soconaya uga gaadhaan jaangooynta xisaabaya maaliyeed.
- Qodob xusaya sida Dawladdu uga qayb qaadanayso dheefkorka laga helo macdanta, sida dheefkorka wareega.
- Kharashaadka iyo cashuuraha ay qaadaan xafiisyada kale, ay ku jiraan dawladaha hoose iyo wakaaladaha kale ee dawladda.

Dawladdu waxay mar kasta ku dadaalaysaa inay yarayso kharashka shirkaddahashirkaddaha macdan-qodista kaga baxa ka hortagga iyo yaraynta raad-raabka xun ee deegaanka iyo bulshada kaga timaadda macdanta, iyada oo u maraysay cashuur dhimis ugu samaysanaysa in shirkaddu daryeelka deegaanka iyo dib u habaynta goob hore macdan looga qoday.
Kharashaadka la xidhiidha ruqsad bixinta macdanta iyo khidmaha kale waa in lagu koobaa oo lagu hayaa buugga tacriifadaha macdanta ee ku habboon.



## 3.1.13 Kobcinta iyo qiime ku kordhinta macdanta (value addition)

### Istiraatiijiyadda 8aad

Hirgalinta habab kor loogu qaado maalgashiga macdanta iyo qiime-kordhinteeda

Waddamo badan oo Afrikaan ah iyo qaar kalaba waxay dhiirigaliyaan bah-wadaagta ku salaysan qiime-ku-kordhinga wax soo saarkooda.
Istaraatiijiyadan/Istiraatiijiyaddan ujeedadeedu waxay tahay in la faahfaahiyo tillaabooyinka lagama maarmaanka u ah in la kobciyo maalgashiga macdanta si loo gaadho horumar dhinaca bah-wadaagta iyo koboc dhaqaale.
Dawladdu waxay tixgalinaysaa tillaabooyinka lagama maarmaanka u ah balaadhinta in aan macdanta oo caydhiin oo lakala la sifayn la dhoofiyo, balse ay tahay in macdanta dalka gudihiisa lagu sifeeyo, laguna warshadeeyo, si loo kordhiyo qiimaheeda marka la dhoofiyo.

Intaa waxaa dheer, istaraatiijiyadu waxay u socotaa in Dawladdu isku xilsaarto in harumar lagu sameeyo kala-duwidda macdanaha dalka ka soo baxaya, fududaynta shuruudaha ganacsi faa'íidada dalku helayo iyo siyaasadaha maaliyadeed.

Dawladdu iyada oo fulinaysa siyaasaddan waxay hiigsanaysaa in ay hab isku mid ah u raacdo dhammaam aagagga wax-soo-saar ee dalka si kor loogu qaado qiime ku kordhinta waxsoo saarka (value addition), waxayna bah-wadaagta kala shaqeyn doontaa sidii kor loogu qaadi lahaa dhoofinta wax soo saarka macdanta, iyo kobcinta tiknoolajiyada la xidhiidha qodista, dhalaalinta iyo sifaynta macdanta.

Xeerka Macdanta Somaliland iyo xeer-nidaamiyayaasha waxa looga danleeyahay in sida ugu wanaagsan looga faa'iidaysto aaga macdanta dalka.
Ujeedooyinka xeer-nidaamiyayaashani waa in la gaadhsiiyo ujeedooyinka istaraatiijiyadeed ee soo socda:

- Kordhinta qiime ku-darka alaabta iyo adeegyada dalku soo saaro
- Kordhinta kala duwanaanshiyaha badeecadaha iyo waxsoo saarka dalka
- Dhimista kharashka gala wax-soo-saarka dalka iyo iibgayntiisa.
- Abuurista shaqooyin waara
- Abuuridda fursado ganacsi oo cusub
- Keenidda halábuuro xoojinaya dhaqaalaha guud ee waddanka
- Tartantan ka abuuridda meelo aan ahayn badeecadaha asaasiga ah

Siyaasaddani waxay mar walba u taagantahay inay abuurto jawi faaíido u abuuraya muwaadiniinta. Taa oo loo marayo hagaajinta hannaanka maaliyadeed iyo horumarinta siyaasadaha, xeerarka iyo xeer-nidaamiyayaashala xidhiidha. Sidoo kale waa in wax la qabto arrimaha ka taagan tacriifadda korontada ee dalka, kaabayaasha dhaqaale iyo baahiyaha kale ee bah-wadaagtu u baahantahay.

Dawladdu waxay sii wadi doontaa bixinta kaalmooyin ku wajahan aagga qiime ku kordhinta macdanta, kaalmadaa oo ay ku jiraan hawlaha soo socda:

- Fulinta barnaamij iskaashi wadashaqayneed oo la xidhiidha tikoolojiyadda, si kor loogu qaado halabuurka tiknoolojiyeed awooda tartangelid iyo wax soo saarka macdanta.
- Iyada oo iskaashi lala samaynayo bah-wadaagta macdanta, waxa la samayn doonaa tiknoolajiyada agabka lagu hagaajinayo hannaanka warshedaynta iyo tayeynta macdanta.
- In la aasaaso lana xoojiyo awooda heer qaran ee bah-wadaagta macdanta ee ku wajahan maamulidda, sahaminta, soo saarista, kala sifaynta iyo iibgeynta macdanta.
- In kor loo qaado aqoonta iyo macluumaadka la xidhiidha helitaanka iyo isticmaalidda khayraadka macdanta iyada oo loo marayo xog ururin, faafin iyo hanaanno wadaagiseed oo munaasab ah oo dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba ah lagaga heli karo
- In la sameeyo qiimayn ku saabsan kaabayaasha lagama maarmaanka u ah maalgelinta kala sifaynta macdanta (sida quwad tamareed oo la awoodi karo, layskuna halayn karo, soohdimo dhaqaale oo gaar ah, waddooyin isku xidha goobaha macdanta iyo xarumaha kala safaynta macdanta).
- Qiimaynta heerka baaxadeed ee khayraadka macdanta ee waddanka iyo sida uu gobolada ugu baahsan yahay iyo kala doorashada soo saarista iyo isticmaalka macdanta ee gobol walba.
- Qiimayn lagu ogaanayo awoodaha hay'adaha iyo waxyaalaha ay ku hooseeyaan oo dhibaato ku noqon kara isticmaalidda khayraad macdaneed oo la heli karo iyo talaabooyinka u qorshaysan hay'addahaas si meesha looga saaro xanibaadahaas heer qaran iyo heer gobol/degmoba.
- Diyaarinta bandhigyo macdaneed, tusaale ahaan baahinta xog-ururin, warbixino laga sameeyo goobaha mashaariicda macdanta, siyaabaha loo warshedayn karo khayraadka macdanaha kala duwan, iyo sidoo kale dhiirigelinaha waddanku diyaarka la yahay.

## 3.1.14 Kordhinta Faa'iidooyinka laga dheefsado Macdanta

### Istiraatiijiyadda 9aad

Raacitaanka xayndaab-habraac oo sharci oo hubinaya in la kordhiyo faa'iidooyinka laga dheefsado macdanta, si loo gaadho koboc dhaqaale-bulsheed oo baaxad leh.

Dawladda Somaliland oo ay hagayso istaraatiijiyaddani waxay doonaysaa inay kobciso aaga macdanta, si loo hubiyo in macdanta laga dheefsado faa'iidada ugu badan ee gaadha Shacbiga Somaliland, taas oo gacan ka gaysanaysa kobaca dhaqaalaha, horumarka bulshada iyo guud ahaan in la gaadho horumar dhaqaale oo waara.

Iyada oo loo marayo Xeerka Macdanta Somaliland iyo Xeer-nidaamiyayaasha hoos yimaadda, Dawladdu waxay dhistay oo ay si joogto ah u horumarinaysaa hab maamulka aagamaacdanta iyo macdan-qodista,  si kor loogu qaado ka qayb ahaanshaha dalka ee aaga macdanta, gaar ahaan dhanka shaqo abuurka iyo tababarida muwaadiniinta Somaliland, iibka alaabaha iyo adeegyada laga helayo Somaliland, iyo sidoo kale soo xereraynta dakhliga macquulka ah ee laga helo cashuuraha, ajuurooyinka, waajibaadyada lacageediyo kharashyada kale ee ka soo baxa hawlaha macdanta iyo macdan-qodistaba.

Hagayaasha iyo ilaalimaha ku jira xeer-nidaamiyayaashala xidhiidha ajuurooyinka ee laga hortegayo meel kale u xawilidda qiiaha (transfer pricing) iyo sidoo kale Xeer-nidaamiyaha Ka-warbixinta Hawlaha Macdanta iyo Macdan-qodista waxa looga golleeyahay la hubiyo daahfurnaanta oo laga hor tago lumitaanka dakhliga iyada oo la musuqmaasuqayo ama si xun loo maamulayo.

Siyaasaddani waxay la jaanqaadaysaa ajendayaasha horumarineed ee heer qaran, waxana ujeedadeedu tahay in la dhisho awoodda loogu diyaar garoobayo baahida mustaqbalka fog ee gacan ku habboon ka gaysanaysa kaabidda adeegyada iyo alaabaha u gaarka ah macdanta.

Intaa waxaa dheer istiraatiijiyadaha ka qaybqaadashada ee waddanka waxaa looga danleeyahay in ay cariyaan kala-duwanaanshaha adeegyada dalka laga helayo, oo mudnaanta la siinayo horumarinta xirfadaha lagu horumarin karo aagaga kale oo dalka muhiim u ah.

Si wax looga qabto caqabadaha ka jira helitaanka iyo soo jiidashada shaqaale iyo xirfadyahanno dhanka macdatna ah, ujeedada siyaasaddani waxay tahay in la unko fursaddo waxbarasho iyo tababarro oo la xidhiidha macdanta, taas oo ku iman karta iskaashi dhex mara Dawladda, shirkaddahashirkaddaha macdan-qodista iyo goobaha waxbarashada dalka gudihiisa ah. Taas oo markaa keeni karta in shirkaddaha macdan-qodista ee dalku kala duwaan shaqaalohooda, isla markaana ay ka faa'iidaysan karaan hibooyinka shaqaalohooda siina kobcin karaan.

Si loo xoojiyo isku xidhka danaha gobollada iyo qaranka, shirkaddahashirkaddaha macdan-qodista ee goobaha aadka u fogfog ka hawlgalaa waxay wadaagi karaan xidhiidh lagu wadaagi karo shaqaalaha iyo saadka u baahanyihiin, taas oo gacan ka geysanaysain goobahan macdantu dhaqaalaha waddanka ay wadaagaan, iyada oo loo marayo midaynta mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha ee ay u baahanyihiin.

Isku soo wada duuboo, istiraatijiyadda siyaasaddan ee la xidhiidha kobcinta faa'iidooyinka laga dheefayo macdantu waxay isku dayaysaa in ay wax laga qabto dhibaatooyinka ka taagan xidhiidhada loo baahanyahay, maalgashiga, iyo kala-duwidda adeegyada ku qotoma cilmi-baadhista iyo hal-abuurka, maadaama ay sees u yihiin wax soo saarka warshadeed ee qiime-ku-kordhinta macdanta ku salaysan.

Ujeedada laga leeyahay waa:

- Abuuridda aag macdaneed ah oo casri ah isla markaana gacan ka gaysta koboc sal balaadhan, iyada oo loo marayo isku xidhka kaabayaasha macdan-qodista, kor illaa hoos.
- Kordhinta maalgelinta ku qulqulaya macdan-qodista iyo kaabayaasha la xidhiidha, si ay u kaabaan horumar dhaqaale-bulsheed oo baaxad wayn leh.
- Kor u qaadida xidhiidhka ka dhexeeya xarumaha cilmi-baadhista iyo hal-abuurka macdanta iyo aagaga kale ee dhaqaalaha iyo bulshada, iyada oo loo marayo abuurista heer aqoon la taaban, kordhinta maalgelinta gudaha, iyo kobcinta hannaanka isku dhafan ee lagu horumariyo aaga macdan-qodista.
- Sare u qaadidda fursadaha waxbarasho, tababar, shaqaale ee macdanta, iyo dhiirigelinta muwaadiniinta Somaliland sidii ay u noqon lahaayeen mulkiilayaasha iyo maamulayaasha shirkaddahashirkaddaha macdan-qodista iyo in ay bataan xirfadlayaasha iyo shaqaalaha ka shaqeeya bah-wadaagta macdan-qodista.

## 3.1.15 Wadaagidda Faa'iidada Macdanta Laga Dheefsado

**Istiraatiijiyadda 10aad**

Dejinta nidaamyo loo raaco wadaagidda faa'iidada ka soo baxda macdanta ee u dhexeysa Dawladda Dhexe, Gobollada, Degmooyinka Macdanta laga qodo iyo Bulshooyinka ay deegaankooda ka socdaan hawlaha la xidhiidha macdan-qodistu.

Istaraatiijiyadani waxaa ujeedadeedu tahay in la kordhiyo qiimaha iyo tirada faa'íido ee laga helayo ganacsiyada macdanta iyo sida ay u horseeddo harumar maxalli ah, oo ay ku jirto abuurista shaqooyink cusub, kobcinta awoodaha muwaadiniinta, iyo horumarinta kaabayaasha deegaanka iyo adeegyo aasaasi ah oo gaadha bulshooyinka macdan laga qodayo degaankoooda.

Sidoo kale, Dawladdu waa in ay dejiso oo ay fulisaa qorshayaal kala duwan iyo qaabab loo wadaagi karo faa'iidada macdanta, oo looga golleeyahay in la abuuro mashaariic macdaneed oo loo dhanyahay. Gobollada, Degmooyinka, iyo bulshooyinka ku nool deegaannada macdan-qodistu ka socoto waxay u baahan yihiin in laga caawiyo sidii ay si wax ku ool ah ula qabsan lahaayeen hawlaha macdan-qodista, si ay u gaadhaan barwaaqo waarta, iyo ilo dhaqaale oo kala duwan.

Dawladdu iyada oo kaashanaysa daneeyayaasha macdanta waxay sidoo kale sii wadi doontaa inay jaangoyso agabka macdanta ee dalka gudihiisa laga heli karo. Ganacsatada Somaliland waxa lagu dhiirigelinayaa in ay soo saaraan oo ay ka qayb qaataan soo saarista iyo samaytna qalabka macdan-qodistu u baahan tahay, iyo in ay qiime ku kordhinta macdanta laga soo saaro ku dadaalaan.

Waxqabadka bulsheed wuxuu u baahan yahay in shirkaddaha macdantu ay la yimaadaan hindise dakhli-abuur loogu samaynayo bulshada ay rabaan inay ka dhex bilaabaan macdan-qodista. Taas ayaa la filayaa inay ka difaacdo shirkaddaha ka shaqeeya macdanta inay carqalad kala kulmaan bulshooyinka ay saamaynayso hawlgallada macdan-qodistu.

## 3.1.16 Wadaagista Dheefta Laga helo Ajuurooyinka Macdanta

Khayraadka macdantu waa hanti qaran oo xaddidan, waxaana hubaal ah in maalin maalmaha ka mid ah uu dhammaan doonto.

Siyaasaddani waxaa ujeedadeedu tahay in la hubiyo in macdantu (si dadban) u noqoto mid waarta, iyada oo loo marayo isku xidhka dhaqaalaha maaliyadeed iyo macdanta. Udub dhexaadka istiraatiijiyadani waa muujinta muhiimadda ay leedahay kor u qaadidda xidhiidhka ka dhexeeya maaliyadda iyo in wixii ka soo xerooda kirada goobaha macdanta dib loogu maalgeliyo aaga macdanta, si loo gaadho horumar waar a oo dhanka dadka, bulshada iyo kaabayaasha dhaqaalaha ah, si ay ugu yaraan beddel ugu noqoto hantidii macdanta ee meesha ka baxday, siina waddo faa'iidadii macdanta laga dheefay muddadii ay socotey macdan-qodistu.

Si haddaba loo xaqiijiyo in si caddaalad ah loo wadaago faa'iidada macdanta, Dawladda Somaliland waxay meel marisay xeer iyo xeer-nidaamiyayaal qeexaya hababka loo wadaagayo dheefta laga helo ajuurooyinka macdanta, wadaaggaas oo u dhaxeeya Dawladda dhexe, Gobollada, Degmooyinka iyo bulshada degaamadooda macdata laga qodayo.

## 3.1.17. Heshiisyada Horumarinta Bulshada (Community Development Agreements (CDA))

Dawladda Somaliland waxay garwaaqsantahay doorka muhiimka ee bulshada degaankooda macdanta laga qodoyaa ku leeyihiin guusha laga gaadhi karo aaga macdanta. Sidoo kale, Dawladda Somaliland waxay qirsan tahay in bulshada iyo deegaankaba dhibaato ka soo gaadhi karto hawlaha macdan-qodista, halka mashaariicda macdan-qodistu ay guud ahaan faa'iido dhaqaale ku soo kordhiyaan dakhliga dalka iyo guud ahaan aagaga dhaqaalaha dunida, is maan dhaafkaa oo inta badan dhalin kara khilaaf ka dhex dhaca shirkaddaha iyo bulshada ay ka dhex qodayaan macdanta.

Way adagtahay inta badan in hawlaha iskaa wax u qabso iyo is xilqaanka ku dhisan ee shirkaddaha macdantu ku kaabaan bulshooyinka ay ka dhex shaqaynayaan ay xalliso saamaynta taban ee bulshada ka soo gaadhi karta hawlaha macdan-qodista. Taas oo Dawladda ku khasbaysa in ay meel mariso nidaam heshiis oo ah Heshiiska Horumarinta Bulshada in la hirgaliyo, kaas oo si cad loogu qeexay siyaasadda, xeerka iyo xeer-nidaamiyayaashaba.

Sidaa daraadeed Dawladdu dejisay shuruudaha laga rabo shirkaddaha macdan-qoidta marka ay bulshada agagaarka la gelayaan heshiiska horumarinta bulshada oo hore loogu qeexay xeerkaiyo xeer-nidaamiyayaashiisa.

Shirkaddaha macdan-qodista waxa waajib ku ah in ay si hanaan fiican leh uga gorgortamaan heshiiska, ka dibna ay Heshiiska Horumarinta Bulshada la galaan Wasaaradda oo ka wakiil ah bulshada.
Qodobbada Heshiiska Horumarinta Bulshada ee xeerka iyo xeer-nidaamiyayaashawaa dhaqan gal, waxayna leeyihiin hannaan loo kormeerayo loona hubinayo in ay si habsami ah u fuleen.

## 3.1.18 Ka-Qayb Galka Macdandanta ee Loo Simanyahay

### Istiraatiijiyadda 11aad

Samaynta iyo hirgelinta hababka kor loogu qaadayo ka-qaybgalka Dawladda (heer qaran iyo heer-gobolba), bulshooyinka ay saamaynayso macdandan qodistu iyo daneeyayaasha kale ee maalgashiga macdanta.

Dawladda Somaliland waxa ay rabtaa in ay hubiso in muwaadiniitu si loo simanyahay u maalagashadaan hawlaha macdan-qodista, si ay u xoojiso in muwaadiniintu dawr roon ku yeeshaan hawlaha macdana.
Waxaa hadda jira hanaanno ay ka mid yihiin xeerar iyo xeer-nidaamiyayaal, si loo xaqiijiyo, waa in:

- Samaynta Shirkad Qaran oo Macdan-qodista ku hawlan, oo noqota garabka dawladda ee maalgelinta macdanta iyo macdan-qodista.
- Saami aan lagac la bixinayn oo Waddanku helo
- Saami Waddanku lacag ku bixiyo helitaankiisa
- Ka qayb gal loo simanyahay oo bulshada, iyaga oo ah keli keli, ururro, ama shirkaddo.
- Heshiisyada macdanta ee ku salaysan Iskaashatooyinka wadajirka ah

## 3.1.19. Macdan-qodista Qadiimiga ah iyo Macdan-qodista Kooban (Artisanal and Small-Scale Mining)

### Istiraatiijiyadda 12aad

Samaynta xayndaab-habraac oo nidaaminaya isla markaana rasmi ka dhigaya Macdan-qodista Qadiimiga ah iyo Macdan-qodista Kooban

Dawladda Somaliland waxa garwaaqsantahay tahay doorka muhiimka ah ee ay Shirkaddaha Macdan-qodista Qadiimiga ah iyo kuwa Macdan-qodista Kooban ku hawllan ka ciyaaraan aaga macdanta iyo macdan-qodista, gaar ahaan wax ku darsiga togan ee ay ku leeyihiin dhaqaalaha miyiga ee bulshooyinka fogfog oo ay u sameeyaan ilo lagu noolaan karo.

Sidaas oo kale, Dawladdu waxay garwaaqsantahay caqabadaha lagala kulmo shirkahadahaa,cagaqabadaasi oo ay ka mid yihiin ka faa'iidaysiga saboolnimada bulshada, iyo ku xad gudubka xeerarka iyo shuruucda, taas oo wax yeello weyn gaadhsiin karta iyaga iyo bulshooyinka ay ka dhex shaqaynayaan iyo deegaankaba, kuwaas oo dhammaan shirkaddaha ka horjoogsan kara gaadhitaanka yoolka badhaadhe ee ay hiigsanayaan.

Ujeeddadan siyaasadeed waxa looga gol leeyahay:

- In laga faa’iidaysto shirkaddaha ku hawllan macdanta qodista qadiimiga ah iyo macdan qodista kooban labadaba, si ay horumar wax ku ool uga gaystaan nolosha reer guuraaga, si loo cariyo hal-abuur ganacsi oo ku dhisan xil iska saaridda  bulshada iyo in kor loo qaado horumar heer qaran oo iskud dhafan.
- In la helo shirkaddo ku hawlan macdan-qodista qadiimiga ah iyo macdan-qodista kooban, oo wax ku darsi togan ku yeesha koboca dhaqaalaha dalka.
- In shirkaddaha ku hawlan macdan-qodista qadiimiga ah iyo macdan-qodista kooban laga dhigto mishiinka dhaqaajiya horumarka waara ee bulshooyinka reer miyiga ah.
- In si waafi ah wax looga qabto caqabadaha soo wajaha shirkaddaha macdan-qodista qadiimiga ah iyo shirkaddaha macdan-qodista kooban ku hawllan, iyada oo loo raacayo tallaabooyin isu xiga oo si wax ku ool ah uga qabanaya caqabadaa.
- In siyaasadda shirkaddaha macdan-qodista qadiimiga ah iyo shirkaddaha macdan-qodista kooban ku hawllan ay qayb ka noqoto istaraatiijiyada qaran ee horumarinta reer miyiga.
- In la fuliyo tallaabooyin ku wajahan shirkaddaha macdan-qodista qadiimiga ah iyo shirkaddaha macdan-qodista kooban macdan ku hawllan, oo loogu baddalayo shirkaddo waawayn oo waxtran roon leh.
- In la sameeyo xayndaab-habraac loogu talagalay horumarinta iyo habaynta shirkaddaha macdan-qodista qadiimiga ah iyo shirkaddaha macdan macdan-qodista kooban ku hawllan.
- In la xaqiijiyo in shirkaddaha macdan-qodista qadiimiga ah iyo shirkaddaha macdan-qodista kooban ku hawllan ay heli karaan maalgelin iyo daymo ay ka helaan xarumaha maaliyadeed.

- In dhammaan dawladda, qaadhaan-bixiyayaasha, bangiyada iyo xarumaha maaliyadda, ganacsata iyo bulshaduba dhammaan ka qayb qaataan sidii loo horumarin lahaa loona taageeri lahaa shirkaddaha macdan-qodista qadiimiga ah iyo shirkaddaha macdan-qodista kooban.
- Dib u habaynta shuruucda iyo siyaasadaha qaranka si loo dhiirigaliyo shirkaddahashirkaddaha macdan-qodista, qandaraaslayaasha ka hoos shaqeeya shirkaddahaa, iyo si loo sameeyo awood kobcin iyo khibrad wadaag ay ka helaan shirkaddo aad ugu xeel dheer macdan-qodista.
- In shirkaddaha macdan-qodista qadiimiga iyo macdan-qodista kooban loo qoondeeyo goobo gaar ah ay ka hawl gali karaan.
- Fududeynta iyo dhiirigelinta in shirkaddaha macdan-qodista qadiimiga iyo macdan-qodista kooban ay samaystaan iskaashatooyinka iyo ururro.
- Si loo maareeyo iskudhacyada ka dhasha ka faa'iidaysiga dhulka ee dhinaca macdan-qodista qadiimiga ah iyo shirkaddaha macdan macdan-qodista kooban Wasaaradda ka mas'uulka ah macdanta iyo macdan-qodista ayaa soo saari doonta nidaamyo midaysan, in loo qoondeeyo goobo gaar ah macdan-qodista, nidaamayadaa oo ay ku jiraan ogeysiis ku filan oo hordhac ah in la siiyo bulshada, iyo in la kordhiyo ka qaybgalka bulshada ee qoondaynta goobaha macdan-qodista.
- Si loo dhiirrigeliyo adeegsiga tignoolajiyadda ku habboon, la awoodi karo ee bedqabku ku dheehanyahay ee loo adeegsado macdan-qodista, Dawladdu waxay sii wadi doontaa inay dhiirrigeliso helitaanka tignoolajiyado dalka ku habboon oo hal-abuur cusub leh.
- Si loo yareeyo saamaynta taban ee hawlaha macdan-qodista qadiimiga ah iyo macdan-qodista qadiimiga ah, Dawladdu waxay faafin doontaa macluumaadka kor loogu qaado wacyiga caafimaadka, ee la xidhiidha badbaado-qabka iyo khataraha deegaanka ku iman kara, waxayna dib u eegi doontaa oo faafin doontaa hagayaasha caafimaadka iyo badbaado-qabka shaqo ee macdan qoddista qadiimiga ah iyo macdan-qodista kooban.
- Iyada oo la ogsoon yahay dabeecadda is beddelka badan ee macdanta qodista, Dawladdu waxay dib-u-eegis ku samayn doontaa xayndaabka sharci ee hawlgallada macdan-qodista qadiimiga ah iyo macdan-qodista kooban.

## 3.1.20. Jinsiga, Dhallinyarada iyo u wada-dhammaanshaha Macdan-qodista

### Istiraatiijiyadda 13aad

In la sameeyo oo la hirgeliyo xayndaab-habraac, nidaamyo iyo hannaanno hubinaya in haweenka, dhallinyarada iyo dadka nuguli si caddaalad ah uga qayb qaataan hawlaha macdanta, kana mid noqdaan mulkiilayaasha iyo dadka go'aanka ka gaadha hawlaha macdan-qodista.

Dawladda Somaliland waxay garwaaqsantahay in ay jiraan laba dhinac oo wax qabad ah oo kala waxqabadka bulshada iyo waxqabadka ganacsiga. Inta siyaasaddan la joogo, waxqabadka bulshada waxa si balaadhan loogu qeexi karaa wadarta dhawr qodob oo ay ka mid yihiin ka qaybgalka daneeyayaasha macdanta, qiimaynta raad-reebka macdantu ku yeelan karto bulshada, iyo maalgashiga bulshada.

Shirkaddaha macdantu waa in ay fahansiyihiin qiimaynta saamaynta bulsho ee macdanta iyo qiimaynta khataraha ka dhalan kara, saamayntaas oo noqon karta mid togan iyo tabanba oo macdantu ku yeelan karo bulshada, iyo in macdanta ay ka dhalan karaan iska-horimaadka ka dhex dhaca deegaamada iyo bulshooyinka macdan-qodistu ka socoto. Sidaa daraadeed, shirkaddaha macdantu waa in ay sameeyaan istiraatiijyado lagu dhimayo lagagana bixi karo khatarahaas.

Maalgashiga bulshadu wuxuu keenayaa in la dajiyo qorshe wax ku ool ah oo wax lagaga qabanayo musuqmaasuqa iyo anshax xumada. Intaa waxa dheer, waa in maalgashadayaashu dareensan yihiin in qoondada haweenku muhiim u tahay maalgashiga.

Istaraatiijiyaddan siyaasaddeed waxaa looga golleeyahay inay sees u noqoto xayndaab-habraac oo sharci oo isku xidhaya waxqabadka bulsho iyo aaga macdan-qodista guud ahaan, si qodobbadaa sare oo dhan loogu dhaqo ganacsiga macdanta guud ahaan. Istiraatiijiyaha hoos iman kara tan waxa ka mid ah:

- Samaynta iyo hirgalinta barnaamijyo waxbarsho iyo tababarro macdanta la xidhiidha, oo ay bixinayaan goobaha waxbarashada dalku, oo loogu tala galay dhallinyarada, haweenka iyo dadka kale ee nugul.
- In la dhiso xayndaab-habraac oo qaabaynaya hannaanka ay dhallinyarada, haweenka, dadka la hayb sooco iyo dadka nuquli uga qayb qaadan karaan hawlaha macdan-qodista.
- Samaynta hannaan lagu hubinayo in si siman looga wada faa'iidaysto khayaraatka macdanta, si aan loo faquuqin dhallinyardda, haweenka, iyo dadka naafada ah, ama si aan habboonayn loola dhaqmo oo khatar la geliyo.

- Hirgelinta xayndaab-habraac oo sahlaya wada-hadal iyo xog is-dhaafsi dhexmara dhammaan daneeyayaasha kala duwan ee aaga macdan-qodista.





# Cutubka

# 04

## Qaab-Dhismeedka Haayada

## 4.1 Kobcinta Awooda

Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Jamhuuriyadda Somaliland waxay masuul ka tahay hubinta, horumarinta, masuuliyada maamul iyo waaritaanka Macdanta iyo Macdan Qodista Somaliland iyada oo loo daneeynayo magaca shacabka Somaliland.

Sidoo kale Wasaaraddu waxay masuul ka tahay jaangoynta iyo dabagalka Ajuurooyinka, lacagaha, cashuuraha iyo ganaaxyada kale, waxay kaalin hormood ah ka qaadataa bixita xogta cilmi-dhuleed taasoo ka caawinaysa maalgashiga gaarka ah horumarinta iyo sahaminta khayraadka.

Iyada oo xeernidaamiyaha maamula bah-wadaagta waxsoosaarka macdanta iyo wixii la mid ah, wasaaraddu waa hay'adda hormuudka u ah xayndaab-habraaca sharci, nidaaminta, isku xidhka, iyo aragtida fog ee hirgelinta siyaasadda hay'ado badan. Wasaaraddu waxay hubinaysaa badqabka caafimaadka iyo deegaanka Somaliland inay waafaqsan yihiin hab-dhaqanka ugu wanaagsan iyo sidoo kale inay waafaqsan yihiin dastuurka iyo xeerarka kaleba Somaliland.

Siyaasadani waxay dhiirigalinaysaa inay kor u qaaddo sharciga iyo qawaaniinta macdanta Somaliland si ay u fududaato bixinta xogta cilmi-dhuleed iyo hal-abuurnimada maamul ee sinaanta iyo xafidida maamulka goobaha xuquuqaha macdaneed taasoo soo jiidasho u leh maalgashi Macdanta iyo Macdan Qodista isla markaana amaan u leh Somaliland.

Ku talo galka Kobcinta awoodu waa in si wax ku ool ah looga faa’iidaysto joogtaynta iyo maaraynta raasmaaalka haayada iyo shaqaalaha loona horumaraiyo bah-wadaagta Macdanta iyo Macdan Qodista. Mid ka mid ah ujeedooyinka ugu muhiimsani waa in la hubiyo in si hufan oo caddaalad ah loo hirgeliyo sharciyada iyo xeerarka.

## 4.2 Nidaamaynta Haayadda

Waaxda Macdanta waa in lagu Maamulaa hanaankan Waaxaha, Qaybo, Ungyo iyo Wakaalado Gaar ah iyada oo loo marayo:

- Sahanka Cilmiga Dhulka
- Qodista Macdanta
- Ruqsaddaha iyo Ogonlaashaha
- Horumarinta Macdanta iyo Kordhinta Qiimaha Mcdanta
- Shahaada Shaybaadhka Macdanta ee Caalamiga ah iyo Bankiga Kaydinta Xogta

- Kormeerka, Dabagalaka iyo Fulinta Macdanta
- Hanti-dhawrka Macdanta
- Shirkadda Macdanta Qaranka
- Maxadka Macdanta Qaranka
- Gudida Qiimaynta Xuquuqaha Macdaneed
- Gudida Farsamada, Swir-gacmeedka iyo GIS-ka

Sidaa awgeed, Dawladdu waa inay dejiso hab-raacyo ku habboon nidaaminta hay'adaha si ay u qabato arrimaha soo socda:

- Bixinta xogta lagu kalsoon yahay ee aasaasiga ah iyo xog-cilmiyeedka si loo dhimo khataraha sahaminta maalgashadayaasha.
- In loo maareeyo sihufan oo daah-furan ruqsaddaha iyo heshiisyada ku jira diwaanka xuquuqaaha macdaneed ee la dayactiray.
- Horumarinta iyo hirgelinta nidaam maaliyadeed oo soo-jiidasho leh, hannaankaas oo awood siinaya kor u qaadida iyo dhiirigalinta sii haynta maalgashiga qaybaha macdanta iyo macdan qodista.
- Kormeeritaan, isku-dubaridka iyo nidaaminta shirkaddaha macdanta , iyada oo loo marayo u hoggaansanaanta iyo dhaqangalinta kormeerka.
- In la kormeero macdan soo-saarka iyo dakhliga iyada oo loo marayo hannaanka habaysan ee xisaabeedka macdanta.
- Kor u qaad iyo ka faa'iidaysiga kordhinta qiimaha macdanta.

- Bixinta adeegyo shaybaadh oo la aqoonsan yahay;
- Yagleelida talaabooyinka badbaadada iyo hababka lagu hubinayo soo dejinta, gaadiidka, iibinta, isticmaalka, kaydinta iyo habaynta walxaha khatarta ah oo ay ku jiraan walxaha qarxa; iyo
- Yagleelida hannaan ka shaqaynaya qaabla ay uga qayb galilahaayeen daneeyayaasha iyo la-tashiga dadweynaha.




# Cutubka

# 05

## Qorshaha Fulinta

## 5.1 Xayndaab-Habraaca Fulinta

Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ayaa u xil-saaran sidii loo horumarin lahaa, loo maamuli lahaa kheyraadka macdanta Somaliland si ay uga faa'iidaystaan shacabka Somaliland.

Maadaama uu yahay xeer-nidaamiyuhu mid u xil saran soo-saarida qaybaha macdanta iyo shidaalka, Wasaaraddu waa hay'adda u xil-saaran hoggaaminta, hubinta iyo dhaqan-gelinta siyaasaddan. Marka la dhaqan galiyo siyaasaddan, Wasaaraddu waa in ay dejiso xeelado istraatijiyeed oo ay ka midka yihiin wada shaqaynta hay'adaha kala duwan iyo in ay kaalin ku yeeshaan qaybaha kala duwan ee maalgashadayaasha iyo hawlgalayaasha ee ay ka midka yihiin daneenayayaasha horumarinta Macdanta, ganacsiga gaarka ah iyo sidoo kale ururada bulshada rayidka ah ee ku lug leh u doodista arrimaha macadam soo-saarka. Intaa waxaa dheer, Wasaaraddu waa inay dejiso hanaan istaraatiijiyadeed oo faahfaahsan kuna dhisan la-tashi dadweyne oo waxtar leh siyaasadan.
Jaantuska ku lifaaqan siyaasaddan ayaa Wasaaradda ku hagaya hirgelinta siyaasaddan.

## 5.2 Maalgalinta Siyaasadda

Dhaqangelinta Siyaasaddan waxay u baahan tahay dhaqaale, aqoonta shaqaalaha, aqoon farsamo iyo khayraadka kale ee uu ka midka yahay agabka. Sidaa darted, waxay u baahan tahay hal-abuuro tiro badanoo cusub, sida habka iyo hirgalinta maalgelinta.

Maalgelinta udub-dhexaadka u ah hawshan siyaasadda, waa in laga maalgeliyaa hantida Miisaaniyadda Qaranka ee loo qoondeeyay Wasaaradda.

Intaa waxaa dheer, waa in lagu dadaalaa sidii dhaqaale dheeri ah looga uruurin lahaa ganacsiga gaarka loo leeyahay iyada oo loo marayo Iskaashiga Dawladda iyo Ganacsiga Gaarka ah (PPP). Sidoo kale, daneeyayaasha horumarineed waa in ay ka hawl galaan sidii ay taageero u siin lahaayeen hirgelinta siyaasaddan.

## 5.3 Qiimaynta iyo Dabagalka

Si loo xaqiijiyo xoojinta hirgelinta siyaasaddu in ay ku socoto qaabkii loo baahnaa, loogana midho dhalin lahaa yoolalka iyo hiigsiga siyaasadda, waa in la sameeyaa hab iyo hanaan lagu hirgaliyo dabagal iyo qiimayn faahfaahsan, iyada oo la adeegsanayo tilmaamayaasha muhiimka u ah waxqabadka si loo hago qorshaha qiimaynta iyo dabagalka.

## 5.4 Dib u eegista Siyaasadda


Saamaynta dhaqdhaqaaqyada caalamiga ah iyo kuwa gobolka ee muhiimka ihi waxay si degdeg ah u horumarinayaan Bah-wadaagta Macdanta iyo Macdan Qodista, sida isbeddellada suuqa badeecadaha, hal-abuurka cusub ee bah-wadaagta Macdnata, iwm. Natiijo ahaan, tani waxay keenaysaa in la hubiyo, la ilaaliyo iyo in loo hoggaansanaado siyaasaddan. Hababka iyo dhaqdhaqaaqa ugu wanaagsan ee dib u eegista xilliyada sameeynta wakhiyada go’aan ee waafqasan heerarka maxalliga ah, ama gobolka ah iyo kuwa caalamiga ahba.



## 5.5 Gallery Photos





















Arinta Siyasada



























# SIYAASADDA MACDANTA

## 2025

Macnaha guud ee siyaasaddani waa bayaan qoraal ah oo xusaysa xayndaabka, habraacyadda, mabaadi'da iyo istiraatiijiyadaha Dawladda ku hagi doona maaraynta aaga macdanta iyo macdan-qodista, taas oo keeni doonta koboc dhaqaale iyo mid dhaqaale-bulsheedba.
Siyaasadani waxay ku qotontaa sidii Khayraadka macdanta loo intifaacsado qaab leh joogtayn deegaan iyo masuuliyad bulsho, waxay dhinacyo kala duwan ka horumarin kartaa dhaqaalaha dalka.